Socialförvaltningen Nordost Göteborg

Göteborgs Stad

# Hagaha qoyska

## ee Woqooyiga bari ee Göteborg

Talo ku saabsan hawlo, talooyin iyo taageero laguugu talagalay adigaaga deggan Angered, Kortedala, Bergsjön, Gamlestaden iyo Utby.



goteborg.se

# Waa lugu salaamay!

Adigaaga qofka weyn ah ee leh canug kula jooga, aadbaad muhiim u tahay. Waa adiga qofka canugga dejinaya, sasabaya, kuna hagaya nolosha oo dhan. Hagahan qoyska waxaa loogu talagalay inuu adigaaga deggan Angered, Bergsjön, Gamlestaden, Utby ama Kortedala kuu fududeeyo inaad hesho hawlo xiiso leh iyo adeegyo ku yaalla agagaarka meesha aad deggantahay.

In carruur la haysto maaha mar walba wax aad u fudud. Maalmaha aad dareemeyso in aysan wax aad u fududeyn, waxaad xaq u leedahay inaad taageero ka hesho bulshada. Sida ugu fiican ilmaha – u isticmaal xaqaas. Hagahan waxaa ku qoran tilmaamo ku aaddan halka aad la xiriiri karto si aad taageero u hesho haddii aad taas u baahan lahaydeen adigaaga qofka weyn ah, ilmahaaga ama qoyskaagu. Hagaha qoysku wuxuu soo uruuriyay in badan oo ka mid ah adeegyada la heli karo, laakiin waxaa jira wax intaas aad uga badan oo la dooran karo, haddii ay noqon lahayd aaggaaga iyo Göteborg inteeda kale labadaba.

Waxaan rejeynayaa in uu hagaha qoysku idinka caawiyo adiga iyo qoyskaaga inaad heshaan waxa aad raadinaysaan iyo inaad waqti fiican isla qaadataan!

# Tusmo


**Familjecentraler (Xarumaha qoysaska)** ..... **5**
**Öppna förskolan (Dugsiga furan ee xannaanada)** ..... **7**
Dugsiyo furan oo xannaano oo takhasus gaar ah leh ..... 10
**Förskola (Dugsi xannaano)** ..... **11**
**Grundskola (Dugsi hoose-dhexe)** ..... **12**
Dugsiga hoose-dhexe ee carruurta baahiyaha gaarka ah leh ..... 13
Leyli-caawin ..... 14
**Hidde iyo dhaqan** ..... **15**
Bibliotek (Maktabad) ..... 15
Bokbussarna (Basaska buugaagta) ..... 16
Kulturskolan (Iskoolka hiddaha iyo dhaqanka) ..... 16
Kulturhus (Xarumaha hiddaha iyo dhaqanka) ..... 17
**Dabiicada, ciyaarta iyo tamashlaha** ..... **18**
Aagagga dabiicada ..... 18
Goobaha ciyaarta iyo dhaqdhaqaaqa ..... 19
Meesha dabaasha ee bannaanka ..... 21
**Tababar oo dabbaal** ..... **22**
Goobaha isboortiga ee xafadda ..... 22
Hoolasha dabaasha ..... 23
Hoolalka barafka ..... 24
Hälsoteket (Hagaaji caafimaadka) ..... 24
**Barkulanno** ..... **25**
**Talo iyo taageero** ..... **32**
Medborgarkontor (Xafiiska muwaadiniinta) ..... 32
Taageerada waaliddiinta ..... 33
Sooshaalka woqooyiga-bari ee Göteborg ..... 35
Taageero loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada ..... 41
Meelo badan oo aad la xiriiri karto si aad taageero u hesho ..... 44
**Daryeelka caafimaadka** ..... **47**
Barnmorskemottagning (Rugta umulisooyinka) ..... 47
Vårdcentral (VC) iyo Barnavårdscentral (BVC) ..... 48
Angereds Närsjukhus (Isbitaalka xaafadda Angered) ..... 50
Folktandvården (Daryeelka ilkaha ee dadweynaha) ..... 51

## Lacag la'aan!

Ma raadineysaa hawlo aan wax lacag ah ku fadhin? Raadi calaamadda lacag la'aan! Haddii ay calaamaddu si toos ah ugu hoos taallo cinwaanka weyn, waxaa dhammaan shaqa hawleedka qeybtaas ku jira hawlo lacag la'aan ah. Waxaa dhici karta in qaar hawlaha ka mid ahi ay lacag yihiin, weydii shaqaalaha goobta jooga iyagaa markaas kuu sheegi doonee.

Haddii aad calankan ku ag aragto hawl-maalmeed, waxay taasi ka dhigantahay in ay jiraan waqtiyo ama hawlo gaar ah oo ku wajahan dadka LGBTQ-ga ah. LGBTQ waxay u taagantahay qaniis, lab iyo dheddig u galmoode, dadka isu beddela jinsiga kale, queer iyo labeeb.



# Familjecentraler (Xarumaha qoysaska)

**0–6 sano**

Lacag la'aan

Waa laguugu soo dhaweynayaa xarumaha qoysaska haddii aad carruur leedahay ama aad ilmo sugeyso. Xarumaha qoysaska waxaa ku yaal rug qaabilaad oo umulisooyin, xarunta daryeelka carruurta (BVC), dugsi furan oo xannaano iyo taageero loogu talagalay waaliddiinta. Dugsiga furan ee xannaanada, waxaad adiga iyo qoyskaagu kula kulmi kartaan qoysas kale, waxaadna uga qeyb qaadan kartaan hawlo firfircooni oo kala duwan.

**Xarunta qoyska waxaa looga hadli karaa waxyaabo ay ka mid yihiin:**

- in waalid la noqdo
- cunto
- hurdo
- in shilal laga hortago
- xudduudaha
- xiriirrada.

### In lala hadlo waalid-taageere

Annaga ayaad nala soo xiriiri kartaa haddii aad doorkaaga waalidnimo ugu baahantahay talo iyo taageero ama rabto inaad ka waalid ahaan horuumariso awoodahaaga ama aad hesho talooyin cusub. Waxaan waaliddiinta ula kulannaa gooni-gooni, labo-labo ama koox-koox.

Waxaan joognaa xarunta qoysaska, waxaanna qaabilsannahay waaliddiinta leh carruurta da'doodu tahay 0-12 sano. Waxaad dooran kartaa inaad nala kulanto ama aad taageero ku hesho wadahadal xagga teleefanka ama fiidiyowga ah. Macluumaadka xiriirka waxaad ka heli kartaa xarun kasta oo qoyska hoosteeda.

Woqooyiga-bari ee Göteborg waxaa ku yaal afar xarun qoyseed

- Xarunta qoyska ee faras magaalaha Angered
- Xarunta qoyska ee Bergsjön
- Xarunta qoyska ee Hjällbo
- Xarunta qoyska ee Lövgärdet.

## Xarunta qoyska ee faras magaalaha Angered

**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Maxaddada ugu dhaw**: Angered Centrum

**Rugta qaabilaadda ee umulisooyinka**
031-747 96 50

**BVC Närhälsan Angered**
031-747 96 40

**Capio Läkarhus BVC**
031-722 11 84

**Dugsiga furan ee xannaanada**
031-365 18 34

**Waalid caawiye**
072-742 85 20, 031-365 12 32 ama 031-365 25 47

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjecentralangeredcentrum

## Xarunta qoyska ee Bergsjön

**Cinwaanka:** Rymdtorget 8
**Maxaddada ugu dhaw**: Rymdtorget

**Rugta qaabilaadda ee umulisooyinka**
031-747 80 80

**Nötkärnan Bergsjön BVC**
031-792 94 40

**Dugsiga furan ee xannaanada**
031-365 45 22

**Waalid caawiye**
031-365 40 62

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjecentralenbergsjon

## Xarunta qoyska ee Hjällbo

**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Maxaddada ugu dhaw**: Hjällbo

**Rugta qaabilaadda ee umulisooyinka**
031-747 96 50

**BVC Närhälsan Hjällbo**
031-747 83 64

**Dugsiga furan ee xannaanada**
031-366 80 17

**Waalid caawiye**
031-365 27 13, 031-365 14 05 ama 072-204 98 61

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjecentralenhjallbo

## Xarunta qoyska ee Lövgärdet

**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Maxaddada ugu dhaw**: Lövgärdet Centrum

**Rugta qaabilaadda ee umulisooyinka**
031-747 96 50

**BVC Närhälsan Lövgärdet**
031-747 85 50

**Dugsiga furan ee xannaanada**
072-856 59 00

**Waalid caawiye**
070-780 10 47, 072-204 98 61, 073-620 89 31 ama 073-558 33 58

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjecentralenlovgardet



# Öppna förskolan

**0–6 sano**
**Lacag la'aan**

Öppna förskolan (dugsiga furan ee xannaanadu) wuxuu barkulan u yahay dhammaan qoysaska. Carruurta waa lagu soo dhaweynayaa halkan iyagoo ka waalid ahaan adiga kula socda ama qof kale oo weyn. Halkaan, waxaad kula kulmi kartaa dad kale oo waaweyn oo carruur wata si aad u wada ciyaartaan, u sameeysaan farshaxan, isula heestaan, waqtina isula qaadataan. Waxaad sidoo kale waalidnimadaada taageero uga heli kartaa shaqaalaha, waxaan isla shaqeynaa BVC-ga iyo waalid taageere.



Dugsiga furan ee xannaanadu waa lacag la'aan. Waxaad waqtiyada uu furanyahay iman kartaa goor kasta oo aad doonto, mana u baahnid inaad hore isaga diwaangeliso. Bogga intarnetka ayaad ka heleysaa waqtiyada uu furanyahay iyo macluumaad kale.

Adigaaga qofka weyn ah ayaa ka mas'uul ah ilmahaaga, wadajir ayaadna uga qeyb qaadaneysaan hawlaha shaqada.

**Faras magaalaha Angered**
**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Telefoonka:** 031-365 18 34
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolanangered
**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

**Bergsjön**
**Cinwaanka:** Rymdtorget 8
**Telefoonka:** 031-365 45 22
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolanbergsjon
**Maxaddada ugu dhaw:** Rymdtorget









**Gårdsten**
**Cinwaanka:** Muskotgatan 47
**Telefoonka:** 070-612 32 68
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolangardsten
**Facebook:** oppnaforskolangardsten
**Maxaddada ugu dhaw:** Gårdsten Centrum

**Hammarkullen**
**Cinwaanka:** Bredfjällsgatan 46
**Telefoonka:** 031-365 26 57
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolanhammarkullen
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen

**Hjällbo**
**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Telefoonka:** 031-365 28 63
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolanhjallbo
**Maxaddada ugu dhaw:** Hjällbo

**Lövgärdet**
**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Telefoonka:** 072-856 59 00
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolanlovgardet
**Maxaddada ugu dhaw:** Lövgärdets Centrum

# Dugsiyo furan oo xannaano oo takhasus gaar ah leh

### Qoysaska qaanso-roobaadka



Qaar ka mid ah dugsiyada furan ee xannaanada ee magaalada Göteborg waxaa ka jira waqtiyo loogu talagalay qoysaska qaanso-roobaadka. Qoysaska qaanso-roobaadka, mid ka mid ah xubnaha qoyska ayaa ah LGBTQI. LGBTQ waxay u taagantahay qaniis, lab iyo dheddig u galmoode, dadka isu beddela jinsiga kale, queer iyo labeeb.

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/oppnaforskolandraken och goteborg.se/oppnaforskolansannegarden

### Waaliddiinta da'yarta ah

Hawlgalka Magaalada Göteborg wuu ku soo dhaweynayaa adigaaga ka yar 23 sano ee sugaya ilmo ama horbaba heysta. Waxaad halkan ka heleysaa barkulan aad adiga iyo ilmahaagu kula kulmi kartaan waaliddiinta kale oo yaryar iyo carruurtooda.

**Telefoonka:** 072-223 67 26
**Cinwaanka:** Drottninggatan 33
**Bogga intarnetka:** stadsmissionen.org

### Dugsiyada furan ee xannaanada ee Kaniisadda Iswiidhan

Kaniisadda Iswiidhan waxay Nylöse/Gamlestaden iyo Utby ku leedahay dugsiyo furan oo xannaano. Wixii macluumaad ah ee dheeri ah ka eeg bogga intarnetka ururra diimeedyada.

**Bogga intarnetka:** svenskakyrkan.se/nylose/barn-ungdomsverksamhet

### Carruurta naafada ah

Dugsiga furan ee xannaanada ee TilLiten ee Bräcke Diakoni wuxuu meelo badan uga yaallaa magaalada, tusaale ahaan Bergsjön. Kooxda carruurta ee kulmaysa waa ay yaryihiin. Dhismayaasha iyo alaab-alaabeyda waxaa la waafajiyay xaaladda carruurta, waxayna meeshu leedahay shuruudo nadaafadeed oo aad u sarreeya. Shaqaalaha ka shaqeeya TilLiten waxay leeyihiin xirfado iyo khibrado kala duwan oo ay tusaale ahaan ku soo qaateen baxnaaninta iyo wadahadallada taageeridda. Badanaa waxaa goobta jooga shaqaale yaqaan calaamadaha iyo qaabab kale oo loo wada xiriiro.

**Bogga intarnetka:** brackediakoni.se/tilliten

### Waaliddiinta qaba xanuunnada dhimirka

Dugsi furan oo xannaano oo loogu talagalay adigaaga la kulmay caafimad darro xagga dhimirka ah oo adiga kugu dhacday, waalidna u ah ilmo ilaa iyo 6 sano jir ah. Laga yaabee in caafimaad darrada xagga dhimirku ay la timid waalid noqoshadaada ama ay horay u jirtay. Sidoo kale lammaanaha iyo xigtada kale waa la soo dhaweynayaa.

Kulan kasta waxaa ku jira ciyaaro, qaxweysi iyo hees yar. Mararka qaar waxaan ka hadalnaa mowduucyo ay ka mid yihiin baahida carruurta, caafimaadka maskaxda, waalidnimada iyo ammaan-dareemidda.

**Telefoonka:** 031 80 89 95
**Cinwaanka:** Garverigatan 2, 416 64 Göteborg
**Bogga intarnetka:** gyllenkroken.se/gyllingens-smabarnsgrupp-for-foraldrar-och-barn-0-2-ar/





# Förskola

## 1–6 sano

Ma leedahay ilmo da'diisu u dhexeyso hal ilaa lix sano? Haddii ay sidaas tahay wuxuu ilmahaagu dhigan karaa förskola (dugsiga xannaano)!

Dugsiga xannaanadu wuxuu aasaaska u dhigayaa waxbarashada uu ilmahaagu ka sii wadan doono iskoolka iyo nolosha inta ka hadhay. Waxaa halkan ka shaqeeya macallimiin dugsi xannaano iyo shaqaale kale intaba, kuwaas oo ilmahaaga siinaya fursad uu horuumar ku sameeyo, jawi degganna wax ugu barto. Dugsiga xannaanada wuxuu ilmahaagu ku hormarinayaa luqaddiisa. Dhammaan carruurta ay da'doodu u dhexeyso seddax ilaa iyo shan sano waxay xaq u leeyihiin in ay boos helaan 15 saacadood toddobaadkiiba, adigoo aan u baahan inaad lacag bixiso. Sii ilmahaaga billaw wanaagsan!

### Waxay carruurtu ku helayaan dugsiga xannaanada:

- ciyaar iyo in ay carruur kale waqti xiisa leh la qaataan
- ciyaar wax ku barid, sahaminta iyo abuurista qaabab kala duwan
- in ay ku hormaraan aagag badan oo kala duwan, tusaale ahaan xisaabta, sayniska iyo luqadaha
- taageero dheeri ah, haddii loo baahdo, iyadoo tusaale ahaan la kaashanayo bare takhasus gaar ah leh.

### Raadi ee hel dugsiga xannaano

Dugsiga xannaanada waxaa loogu talagalay carruurta oo dhan, laga billaabo marka ay sannad buuxiyaan Waxaa codsiga la sameeyaa ugu badnaan lix bilood ka hor inta uusan ilmahaagu boos u baahan. Woqooyiga-bari ee Göteborg waxaa ku yaal dugsiyo xannaano oo ay degmadu leedahay iyo kuwo madaxbannaan. Bogga **goteborg.se/forskola** ayaad ka arki kartaa dhammaan dugsiyada xannaanada ee aad fursadda u haysato inaad boos ka codsato. Isla bogga ayaad ka sameyn kartaa codsigaaga ama ka daabacan kartaa foomka codsiga.

### Halkaan ayaad ka heleysaa macluumaad dheeri ah

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dugsiga xannaanada, caawimaadna ugu hesho codsigaaga, waxaad la xiriiri kartaa adeegga dugsiyada xannaanada. Waxay xitaa bixiyaan macluumaad ku saabsan "xannaanada habeenki" oo laguugu tala galay adigaaga shaqeeya fiidkii, habeennada ama maalmaha fasaxa iyo xog ku aaddan qoys-xannaano-maalmeed oo la dooran karo dugsiga xannaanada beddelkiisa.

**Telefoonka:** 031-365 09 60
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/forskola, goteborg.se/forskoleservice

Dugsi hoose-dhexe

# Grundskola

## 6–16 sano

Lacag la'aan!

Grundskola (dugsiga hoose-dhexe) wuxuu ka koobanyahay fasalka dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka 9. Iskoolka wuxuu ilmahaagu fursad ugu helayaa inuu horuumar sameeyo iyo inuu waxyaabo cusub barto. Shaqaalaha iskoolku waxay iskaashi la sameynayaan adigaaga qofka weyn ah si aad wadajir isaga kaashataan horuumarka canuggaaga iyo inuu gaaro yoolalka iskoolka.

### Ammaan dareemid iyo taageerada iskoolka

Waaliddiin badan waxay ka fikiraan sida ay wax noqon doonaan marka ay caruurtoodu iskoolka billawdo. Ilmaheygu ma ku faraxsanaan doonaa, saaxibbana ma ku heli doonaa iskoolka? Maxaa dhacaya haddii uusan ilmuhu casharrada la socon karin? Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay iskoolka ammaan ku dareemaan. Sida uu sharciga qabo, waxaa iskoolka waajib ku ah in uu hormariyo xuquuqda sinnaanta carruurta iyo ardayda iyo inuu ka hortago takoorka iyo meel ka dhacyada. Adigu ka waalid ahaan waad waydiin kartaa sida uu u egyahay qorshaha iskoolka ee ka shaqaynta arrintan. Haddii arday si xun loogula dhaqmo iskoolka, waa mas'uuliyadda iskoolka, had iyo jeer, inuu hubiyo in ay taasi joogsato. Dhammaan shaqaaluhu waxay ka shaqeeyaan inay ka hortagaan, ayna wax ka qabtaan takoorsanaanta iyo meel ka dhacyada.

Iskool kasta waa in laga heli karaa tiimka caafimaadka ardayda; bare takhusus gaara leh ama macalin gaar ah, la taliye iskool, kalkaaliso caafimaad oo iskool, cilminafsiyahan iyo taqtar iskool. Waxay wadajir ula shaqeeyaan caafimaadka ardayda, maamulaha, macallimiinta iyo caawiyayaasha ardayda. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ammaan-dareemidda iyo taageerada iskoolka, waxaad la xiriiri kartaa macallinka ilmahaaga, maamulaha ama qof ka mid ah tiimka caafimaadka ardayda. Wuxuu iskoolku aad u jecelyahay inuu kula shaqeeyo ka waalid ahaan. Wadashaqeyn wanaagsan oo dhexmarta iskoolka iyo waalidku waa wax cunugga muhiim u ah si uu ugu guuleysto iskoolka.

**Ma ku adagtahay canuggaaga inuu aado iskoolka? Cinwaanka "talo iyo taageero" ee bogga 38 hoostiisa ayaan ku ururinnay macluumaad ku saabsan sida aad markaas wax yeeli karto.**

### Firiitiid (fritids)

Ardayda dhigata fasalka dugsiga xannaanada, dugsi hoose-dhexe iyo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta baahiyaha gaarka ah leh waxay boos heli karaan firiitiidka. Halkan ayey joogi karaan iskoolka ka hor iyo ka dibba haddii waalidku shaqeeyaan ama wax bartaan. Firiitiidka, waxay ardaydu ku helaan waqti firaaqo ah oo micno leh iyo fursad ay kula tababartaan inay kobciyaan awoodo kala duwan, tusaale ahaan wada xiriirdda, wax abuurista, ciyaaraha, dhaqdhaqaaqyada jir ahaaneed iyo dibad joogidda.

### Dugsiga hoose-dhexe ee carruurta baahiyaha gaarka ah leh

Waxaa halkan dhigta ardayda xagga garaadka naafada ah ee u baahan in si baahidooda waafaqsan iskool loogu dhigo. Waxbarashadu waxay sidaas darteed u dhisantahay si la waafajiyay duruufaha iyo baahiyaha ardayda. Hadafyada dugsiga hoose-dhexe ee carruurta baahiyaha gaarka ah leh waxay ku saleysanyihiin ardayda karaankooda, laakiin intii suurtagal ah waa inay u dhigmaan yoolalka dugsiga hoose-dhexe.

### Halkan ayaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah

Waxaad la xiriiri kartaa maamulka dugsiyada hoose-dhexe haddii aad su'aalo qabto. Halkan waxaad sidoo kale ka heleysaa macluumaad iyo foomam aad boos uga codsato firiitiidka.

**Telefoonka**: 031-365 09 60
**E-mail**: grundskola@grundskola.goteborg.se
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/grundskola

### Iskool dalbo

Bogga goteborg.se/grundskola ayaad ka arki kartaa dhammaan iskoollada jira ee la kala dooran karo. Waxaad sidoo kale halkan boos uga codsan kartaa iskoollada degmada, kana akhrisan kartaa sida ay u egyihiin sharciyada meelayntu. Haddii aad rabto inaad codsato iskool gaar loo leeyahay, toos ayaad ula xiriireysaa iskoolkaas. Haddii aadan codsi soo diran oo aadan sameynin iskool-doorasho, wuxuu ilmahaagu boos ka helayaa iskool u dhow guriga.



# Leyli-caawin

Lacag la'aan!

Caawinta leyliyada waxaa loogu talagalay carruurta iskoollada dhigata iyo adigaaga ah qofka weyn ee waxbarashada ku jira. Ka waalid ahaan, waxaad xitaa waydiisan kartaa talo iyo taageero ku aaddan sida carruurta looga caawin karo shaqada iskoolka iyo leyliyada.

Iskoolladu inta badan waxay ardaydooda siiyaan caawimaad xagga leyliyada ah, badanaane waa firiitiidka cidda ka shaqeysa taas. Fadlan iskoolkaaga weydii, ama usoo jeedi in ay taas billaabaan haddii aysan horbaba jirin. Waxaa sidoo kale oo jira ururro dhawr ah oo caawimaad xagga leyliyada ah, tusaale ahaan maktabadaha, ku siiya carruurta iyo dadka waaweyn labadaba. Xitaa barkulannada/xarumaha waqtiga firaaqada qaarkood waxay leeyihiin leyli-caawin loogu talagalay dhallinyarada.

Lelyli-caawintu waa lacag la'aan, isdiiwaangelinna leesagama baahna. Waqtiyada qaarkood waxaa jirta fursad maaddooyin gaar ah loogu heli karto caawimaad xagga leyliyada ah ama shaqada iskoolka, tusaale ahaan xisaabta, laakiin marar badan wuxuu qofku uga shaqeysan karyaa leyli kasta oo uu doono.

### Hel leyli-caawin

Kalandaariyada magaalada Göteborg ayaad ka arki kartaa waqtiyada hadda jira iyo maktabadaha aad ka heli karto leyli-caawinta. Gal bogga **kalendarium.goteborg.se** ee raadi "läxhjälp" ama iskaangaree koodka QR.





# Hidde iyo dhaqan

## Bibliotek

### Da' kasta

Lacag la'aan!

Bibliotek (maktabadaha) waxaad adiga iyo ilmahaagu tusaale ahaan

- ka deynsan kartaan buugaag, buugaag maqal ah iyo filimaan luqado kala duwan ah
- uga qeybgeli kartaan waqtiga yar ee sheekada ama masraxiyadda carruurta
- ka deynsan kartaan ciyaaraha TV-ga iyo ciyaaraha alwaaxda
- ku akhrisan kartaan wargeysyada
- ka qabsan kartaan kumbuyuutar ama ku isticmaali kartaan mid bannaan.

Waxaa dhismada oo dhan ku jira Wi-Fi bilaash ah, sidaas darteed waxaad sidoo kale intarnet ka geli kartaa kumbuyuutarkaaga.

Macluumaadka ku saabsan saacadaha shaqada iyo barnaamijyada goobta waxaad ka heli kartaa bogga **goteborg.se/bibliotek**. Soo degso app-ka "Biblioteket" si aad buugaag u qabsato ama u aragto waxa ka socda maktabadda magaalada.

#### Maktabadda Angered

**Cinwaanka:** Angereds torg 13
**Telefoonka:** 031-365 17 15
**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

#### Maktabadda Bergsjön

**Cinwaanka:** Bergsjöns Kulturhusväg 4C
**Telefoonka:** 031-368 78 20
**Maxaddada ugu dhaw:** Rymdtorget

#### Maktabadda Hammarkullen

**Cinwaanka:** Hammarkulletorget 62B
**Telefoonka:** 031-365 29 40
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen

#### Maktabadda Hjällbo

**Cinwaanka:** Hjällboplatsen 1
**Telefoonka:** 031-365 27 80
**Maxaddada ugu dhaw:** Hjällbo

#### Maktabadda Kortedala

**Cinwaanka:** Kortedala Torg 9
**Telefoonka:** 031-365 30 88
**Maxaddada ugu dhaw:** Kortedala Torg

#### Världslitteraturhuset

Waxaan haynaa buugaag ku qoran luqado kala duwan. Waa maktabad diiradda saarta dhalinyarada waaweyn iyo dadka wax baranaya. Maktabaddu ma laha qaybta carruurta iyo dhallinyarada.

**Cinwaanka:** Gamlestads Torg 11
**Telefoonka:** 031-365 30 80
**Maxaddada ugu dhaw:** Gamlestads torg

Hidde iyo dhaqan

# Bokbussarna

## 0–12 sano

**Lacag la'aan!**

Gelinka dambe ee maalinta, fiidka iyo maalmaha fasaxa ah, waxaa ay bokbussarna (basaska buugaagtu) tagaan xaafadaha Göteborg. Basaska buugaagta, waxaad ka heleysaa buugaag loogu talagalay carruurta da'doodu u dhexeyso 0-12 sano. Waxaa intaas dheer inaad ka qaadan karto buugaagta aad ballansatay, una dhiibi karto wixii aad deynsatay, iyadoon taas loo eegeyn wax da' ah. Bogga intarnetka ayaad ka arki kartaa meesha ay basasku istaagaan.

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/bokbussen

**Instagram:** bokbussgbg

# Kulturskolan

## 6–19 sano

Ma dooneysaa inaad sameyso wax xiiso iyo hal abuur leh waqtiga firaaqada? Waxaad iman kartaa Kulturskolan si aad u heesto, qoob ka ciyaar u sameyso, uga shaqeyso filim, sawir, dhoobo, sirkus, riwaayada u jisho, u ciyaarto qalab muusik iyo wax kaloo badan.

Kulturskolan wuxuu bixiyaa maaddooyin iyo koorsooyin badan oo kala duwan. Waxaa jira koorsooyin dhaadheer iyo kuwa gaagaaban. Koorada dheer waa lacag, koorsada gaabanna waa lacag la'aan. Dugsiga hiddaha iyo dhaqanku wuxuu sidoo kale leeyahay shaqo-hawleed furan - micnaha koorsooyin aadan u baahneyn inaad is diiwaangeliso oo lacag la'aan ah. Halkaas waxaad ka faa'iideyn kartaa fursad si aad u tijaabiso koorsooyin iyo hawlo kala duwan si aad u eegto waxa aad jeceshahay.
Waqtiyada wax la dhigayo waa waqtiyo ka baxsan saacadaha iskoolka, waa galbihii, fiidadkii, maalmaha fasaxa usbuuca iyo fasaxyada iskoollada. Bogga intarnetka ayey ku jirtaa xog dheeri ah oo ku saabsan iskoolka hiddaha iyo dhaqanka, sida koorsooyinka laga heli karo aagaggiinna, inta lacag ah ee joogaan, deynsashada qalabka muusikada iyo sida aad u codsaneyso. Waxaad sidoo kale toos ula xiriiri kartaa hawl-wadeennada Iskoolka Hiddaha iyo Dhaqanka ee woqooyi-bari.

**Telefoonka:** 031-365 27 67

**E-mailka:** kulturskolan.nordost@grundskola.goteborg.se

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/kulturskolan

### Adigaaga naafada ah

Waa laguugu soo dhaweynayaa inaad soo codsato dhammaan koorsooyinka loogu talagalay da'daada. Waxaan wax u wedeynaa si waafaqsan duruufahaaga ilaa intii suurtagal ah. Waxaa xitaa jira koorsooyin loogu talagalay oo loo habeeyay dadka noocaaga ah. Haddii aad rabto in lagaa caawiyo inaad hesho wax gaar ahaan adiga kugu habboon, adiga iyo qoyskaagu waxaad la xiriiri kartaan mid ka mid ah hagayaasha iskoolka hiddaha iyo dhaqanka oo si kal iyo laab ah kuu caawin doona.

**Telefoonka:** 070-370 77 26 ama 072-734 96 36



# Kulturhus

## Da' walba

**Lacag la'aan!**

Kulturhusen (xarumaha hiddaha iyo dhaqanku) waxay sannadka oo dhan bixiyaan barnaamij dhaqameedyo wata hawlo badan oo loogu talagalay da'aad iyo dano kala duwan. Waxay noqon karaan muusiko, rinjiyeyn, qoob ka ciyaar, masraxiyad, hadallo ku saabsan bulshada, bandhigyo, filin soo bandhigid iyo wax kaloo badan. Waxaad sidoo kale iska iman kartaa halkaas oo aad si deggan isaga joogi kartaa, waqtina kula qaadan kartaa dadka, kuna qaxweyn kartaa.
Woqooyiga-bari ee Göteborg waxaa ku yaal laba xarun-dhaqameed, mid bartamaha Angered ah iyo mid Bergsjön ku yaal. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan saacadaha ay furanyihiin iyo barnaamijyadooda waxaad ka heli kartaa bogaggooda intarnetka iyo baraha bulshada.

### Kulturhuset Bergsjön

**Cinwaanka:** Bergsjöns Kulturhusväg 4C

**Maxaddada ugu dhaw:** Rymdtorget

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/kulturhusetbergsjon

**Instagram:** kulturhusetbergsjon

**Facebook:** kulturhusetbergsjon

### Kulturhuset Blå Stället

**Cinwaanka:** Angereds Torg 13

**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/blastallet

**Instagram:** blastallet

**Facebook:** blastallet



Dabiicada, ciyaarta iyo tamashlaha



# Dabiicada, ciyaarta iyo tamashlaha

### Da' walba

Woqooyiga-bari, wuxuu u dhawyahay dabiicada iyo meesha dabaasha. Halkan waxaa ku yaal kaymo iyo waddooyin wanaagsan oo lagu socdo, meelo wax lagu dubto iyo meelo bannaan oo loogu talagalay ciyaaraha iyo tamashlaha.

## Aagagga dabiicada

Lacag la'aan!

### Dooxada Lärjeån

Lärjeån waxay dhexmartaa dhul qurux badan oo leh beero iyo buuro badan. Halkan waxaad ku arkeysaa xayawaanno daaqaya seerooyinka, waxaadna dhex mareysaa kaymo ku xasuusinaya hawd. Halkan waxaa laga helaa kalluun, cayayaan iyo wax kaloo badan. Soo qaado shabaq, baaldi balaastiig ah iyo weyneyso ee dibadda u bax ee arag waxa aad hesho.

**Maxaddada ugu dhaw:** Hjällbo, Angered Centrum, Kortedalavägen, Aprilgatan, Merkuriusgatan, Eriksbo Västergärde ama Fjäderharvsgatan.

### Seerada dabiicada ee Vättlefjäll

Mid ka mid ah meelaha ugu weeyn ee dabiicada ee Göteborg. Halkan waad ku lugeyn kartaa, waxaad ku wadi kartaa baaskiil, waxaad ku wadi kartaa doon yar, waxaad ku duban kartaa kooraf, waad ku dabaalan kartaa, waxaana ka guran kartaa miro ama barkimo waraabe. Waxaa sidoo kale halkan ku yaal goob jimicsi oo dibadda ah iyo qalqallooc loogu talagalay orodka. Maamulidda jirka ee carruurtu wuxuu ku fiicnaadaa in lagu socod dhulka aan sinneyn, ku tigeysiga meelaha kore iyo dhagxo ku boodidda.

**Maxaddada ugu dhaw:** Kryddnejlikegatan

## Goobaha ciyaarta iyo dhaqdhaqaaqa

Lacag la'aan!

### Angeredsparken

Angeredsparken, inta u dhexeysa suuqa bartamaha Angered iyo Angered Arena ayey ku taallaa goobtan tamashlaha ee leh mawduuca sirkuska. Waxaa xitaa beerta ku yaal meelo wax lagu dubto, meel bowling lagu ciyaaro, meelo la fadhiisto, meel weyn oo uu caws ku fidsanyahay iyo sidoo kale goob jirdhis iyo dhaqdhaqaaqyo kale oo dibadda ah. Laga billaabo horraanta Juun ilaa dhammaadka Agoosto, waxaa maalin kasta oo toddobaadka ah socda ciyaarta biyaha inta u dhexeysa 10ka subaxnimo ilaa iyo 10ka fiidnimo.

**Cinwaanka:** Länkharvsgatan 120
**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

### Bergum fritidslantgård

Waxaa beerta jooga xoolo aad u badan oo kala duduwan oo beerta laga leeyahay sida lo', ido, ari cad, boola-boolooyin, bakaylayaal, digaag iyo bisado. Halkan si xor ah ayaad ugu socon kartaa, una daawan kartaa xayawaannada iyo dabiicada, waana laguu oggolyahay inaad gudaha u gasho oo aad xayawaannada taataabato. Waxaa aagga ku yaal meelo badan oo wax lagu duban karo oo aad isticmaali karto haddii aad rabto inaad shiddo dab yar. Qoryo ayaad ka iibsan kartaa shaqaalaha. Waxay beertu maalin kasta dadweynaha u furantahay laga billaabo 10 subaxnimo ilaa iyo 3 galabnimo. Musqulna waa ay jirtaa.

**Cinwaanka:** Dockereds gård 10



Dabiicada, ciyaarta iyo tamashlaha



**Maxaddada ugu dhaw**: Dockeredsvägen

### Hammerkullens parklek

Meeshan waxaa ka jira dhaqdhaqaaqyo loogu talagalay carruurta ilaa iyo 9 sano jirrada ah. Halkan waxay waaliddiinta iyo carruurtu ka deynsan karaan alaab ay kula ciyaaraan bannaanka, waxay isticmaali karaan qolka hagaajinta, qolka nuujinta iyo musqulaha. Waxaa yaal mikro si cuntada carruurta loogu kululeeyo. Waxaad xitaa ku akhrisan kartaa buugaag, waad ku ciyaari kartaa, waxbaad rinjiyeyn kartaa, geym ayaad ku ciyaari kartaa, canuggaagana waad kula xujootami kartaa. Waxaa jira shaqaale goobta jooga Isniin ilaa Jimco 9 subaxnimo ilaa iyo 4 galabnimo iyo Sabtiyada 11 subaxnimo ilaa iyo 3 galabnimo. Gelinka dambe, waxay shaqaaluhu abaabulaan dhaqdhaqaaqyo kala duwan sida xujootan, isboorti, muusiko, ciyaaro iyo wax rinjiyeyn.

**Cinwaanka:** Hammarkullegatan 62C
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen

### Hjällbo parklek

Meeshan waxaa ka jira dhaqdhaqaaqyo loogu talagalay carruurta ilaa iyo 9 sano jirrada ah oo diiradda lagu saarayo ciyaaraha bannaanka, tusaale ahaan baaskiil wadidda, ciyaaraha kubbadda, teeniska miiska, wax is gelgelin, xujootan, rinjiyeyn, waqti yar oo sheeko, muusiko, waddada xariifnimada dhaqdhaqaaq iyo ciyaaraha biyaha. Waxaa jira shaqaale goobta jooga Isniin ilaa Jimco 9 subaxnimo ilaa iyo 4 galabnimo iyo Sabtiyada 11 subaxnimo ilaa iyo 4 galabnimo.

**Cinwaanka:** Bondegärdet 8
**Maxaddada ugu dhaw:** Hjällbo

### Månadsparken

Goob-ciyaareed ku dhex taal beer yar oo wanaagsan. Waxaa halkan ka jira ciyaar-biyood maalin kasta ka socota laga billaabo 9 subaxnimo ilaa iyo 8 fiidnimo, laga billaabo horraanta Juun ilaa iyo dhammaadka Agoosto. Biyuhu waa tayo biyo ahaan fereesh ah oo aan koloriin lagu darin. Waxaa sidoo kale halkan laga helaa qalab kala duwan oo lagu ciyaaro, barxad bowling, aag wax lagu dubto, garoomo kubbadda cagta ah iyo geedo miro leh.



**Cinwaanka:** Kalendervägen 3
**Maxaddada ugu dhaw:** Runstavsgatan

### Beerta xoolaha ee Magaalada ee Galaxen

Halkan waxaad kula kulmi kartaa xoolaha beerta sida doofaar, bakayle, digaag, fardo iyo ido. Beerta waxaad tusaale ahaan kula dhex nasan kartaa kafateeriyada, waxaad fuuli kartaa faras, waadna taataaban kartaa xayawaannada. Saacadaha furitaanka iyo barnaamijyada hadda jira ka eeg foreningengalaxen.se ama wac.

**Cinwaanka:** Galaxgatan 7
**Telefoonka:** 076-147 31 01
**Maxaddooyinka ugu dhadhaw:** Galileis gata, Orion

### Mowduuca goobta ciyaarta ee Kvibergs Park

Goobta ciyaarta ee Kvibergs Park waxaa ku yaal qalcad-ciyaareed leh dabaqyo iyo minaarad, fardo gacanta lagu sameeyay iyo meelo ay carruurtu ka soo sibibixaystaan. Waxaa xitaa jira roogag moollaati ah, meel fiilo lagu maro, waddo farda bood ah iyo qaar kaloo badan. Carruurtu halkan way ku ordi karaan, waxay ku baran karaan dheelli tirnaanta, way fuuli karaan, siyaabo kala duwanna jir ahaan way ugu dhaqdhaqaaqi karaan. Waxaa ku yaal geedo miro leh, miisas tamashle iyo meelo kale oo la fadhiisto.

**Cinwaanka:** Lilla Luftvärnsvägen 4
**Maxaddada ugu dhaw:** Kviberg ama Kvibergsskolan, dabadeedna ku dhawaad 10–15 daqiiqo oo socod ah.

## Meesha dabaasha ee bannaanka

**Lacag la'aan!**

### Bergsjöbadet

Bergsjöbadet waa haro qubeys oo qurux badan oo leh xeeb bacaad ah, buundo, minaarad laga soo boodo iyo dhagxaan. Waxaa halkan sidoo kale laga helaa goob lagu ciyaaro iyo meel wax lagu dubto. Musqushu waxay furantahay 15 Mey-15 Sebtembar.

**Maxaddada ugu dhaw:** Atmosfärsgatan

### Stora Mölnesjön

Haro kaymeed yar oo leh xeeb, dhagxaan, buundo iyo meel wax lagu dubto. Musqushu waxay furantahay 15 Mey-15 Sebtembar.

**Maxaddada ugu dhaw:** Fjällbruden

### Surtesjön

Surtesjön waxay leedahay labo goobood oo lagu qubeysto oo leh buundo, xeebo bacaad ah, xeebo dhagxaan ah, goobo caws ku fidsanyahay iyo meel wax lagu dubto. Musqushu waxay furantahay 15 Mey-15 Sebtembar.






# Tababar oo dabbaal

## Garoonka ciyaaraha

### Da’ walba

Lacag la’aan!

Goobaha isboortiga ee xaafaddu waa meelo lagu ciyaaro, isboorti lagu sameeyo, waqtina leeskula qaato qorshe la’aan. Waxaa loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Uma baahnid inaad ballan ka qabsato, mar walbana way furanyihiin.

### Goobta isboortiga xaafadda ee Ingefäran

Waxaa halkan laga helaa qalab jimicsi, wiifow, sanduuq ciid ah, meel ay carruurtu ka soo sibibixaystaan, garoon lagu ciyaaro kubbadda kolayga iyo bowling fadhi leh. Waxaa sidoo kale halkan ka jira ciyaar-dabiico leh qori, buul iyo geed-fuul.

**Maxaddooyinka ugu dhadhaw:** Saffransgatan, Timjansgatan

### Waddada caqabadaha leh ee beerta Kviberg

Koorsada caqabada waxay ka kooban tahay 21 caqabadood oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta. Waddada caqabadaha waxaa ku ag yaal qafasyo alaabta lagu xiran karo – ha illoobin inaad soo qaadato qufulkaaga! Waddada caqabadaha waxaa ku ag yaal meel la fadhiisto, meel wax lagu dubto iyo meel roobka laga galo.

**Maxaddada ugu dhaw:** Kviberg, Kvibergsskolan

### Meesha dhaqdhaqaaqa ee Rymdtorget

Waxaa halkan laga helaa masrax qoob ka ciyaar, waddo caqabado leh iyo goob lagu ciyaaro.

**Maxaddada ugu dhaw:** Rymdtorget

### Goobta isboortiga xaafadda ee Teleskopgatan

Halkan waxaa tusaale ahaan ku yaal meel carruurtu ka soo sibibixaystaan oo dheer, shabaq la fuulo, maro raaracda oo la dhex seexdo, aqallo yaryar, sanduuq ciidi ku jirto, barxad bowlin, garoon tennis iyo ”Koob dambas” - aag leh qalab kala duwan oo loogu talagalay jimicsiga.

**Maxaddada ugu dhaw:** Teleskopgatan



## Hoolasha dabaasha

### Da’ walba

Meelo badan oo ka mid ah hoolasha dabaasha ee magaalada, waxaa ka jira casharro xagga dabaasha ah oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn intaba. Waxaad xitaa ka qaybqaadan kartaa jimicsiga biyaha iyo koorsooyinka gurguuradka, ama iskaa ayaad isaga dabaalan kartaa. Ha illoobin inaad soo qaadato quful, ama mid ka iibso qasnadda. Ciwaanka iyo saacadaha ay furan yihiin, ka eeg website-ka barkadda dabaasha. Dhammaan carruurta u dhexeyso 0 ilaa iyo 12 sano bilaash ayey ku dabaalanayaan Göteborg.

### Angered Arena

Waxaa loogu talagalay adigaaga raba inaad sameyso dabaal-jimicsi, dabaal, boodboodid ama si deggan ugu jirto berkadda abburta. Waxaa halkan ku yaal minaarad laga soo boodo oo laga soo saaldeeyo, laakiin sidoo kale berkado loogu talagalay carruurta yaryar.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 15
**Telefoonka:** 031-368 22 90
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/angeredarena
**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

### Hammarbadet

Hammarbadet waa hool-dabaaleed yar oo gaar ahaan loo isticmaalo dabaal-baridda, laakiin sidoo kale waxay dadweynaha u furan tahay waqtiyada qaarkood. Waxaa halkan ku yaal berkad yar oo aan qoto dheereyn oo aad ku dabaalan karto, kuna dabaal baran karto.

**Cinwaanka:** Hammarkulletorget 63
**Telefoonka:** 031-368 22 40
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/hammarbadet
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen

### Kristinedals träningscenter

Waxaa halkan ku taal berkad leh biyo cusba leh oo 25-mitir ah oo loogu talagalay dabaasha jimicsiga iyo tababarashada. Waxaa ka jira iskool dabaal oo loogu talagalay carruurta, suurtagalna ay tahay inuu qof ahaan u dabaal-baro dadka waaweyn. Xadka da’du waa 16 sano (haddii uusan ilmuhu dhiganeyn iskoolka dabaasha).

**Cinwaanka:** Byfogdegatan 4
**Bogga intarnetka:** kristinedal.nu
**Maxaddada ugu dhaw:** Gamlestads torg, Kristinedal

### Fritidsbanken

Fritidsbanken oo Angered ku yaal, wuxuu qof kasta si lacag la’aan ah uga amaahan karaa qalabka ciyaaraha iyo xilliyada firaaqada muddo 14 maalmood ah. Sidoo kale waxaad ugu deeqi kartaa qalabka aanad hadda isticmaalin. Fadlan wararka, waqtiyada furnaanta ee ku meel gaarka ah iyo macluumaadka kale ka eeg Facebook ama Instagram. Barta intarnetka ayaad sidoo kale ka arki kartaa waxa aan hayno waqtiga iminka ah.

**Telefoonka:** 073-749 28 92
**E-mailka:** fritidsbanken.angered@socialforvaltningen.se
**Bogga intarnetka:** fritidsbanken.se, sök på ”Hitta din fritidsbank” och ”Angered”
**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 4
**Maxaddada u dhaw:** Angereds centrum
**Facebook:** Fritidsbanken Göteborg
**Instagram:** Fritidsbankengoteborg

# Ishallar (hoolalka barafka)

### Da' walba

Woqooyiga-bari waxaa ku yaal laba hool oo barafka lagula taraaraxo kabo, mid ku yaal bartamaha Angered iyo mid ku yaal Kviberg. Waxaad soo qaadan kartaa kabahaaga taraaraxa barafka ama waxaad ka kiraysan kartaa goobta. Si lacag la'aan ah ayaad u deynsan kartaa koofiyadda madax-dhowrka marka aad bixinayso lacagta gelitaanka. Waxaa jira noocyo kala duwan oo qalab caawin ah oo loogu talagalay in adigaaga billawga cusub ah aad amaahato ama kiraysato si aad u barato sida loo raaco. Carruurta ka yaryar 12 sano waa inuu la socdaa qof weyn.

Hoolalka barafku waxay waqtiyada qaar u furanyihiin dadka oo dhan. Waqtiga intiisa kale waxaa isticmaala ururrada iyo kooxaha kale ee halkaas ku tababarta. Shakhsiyaad gaar ah, ururro iyo shirkado xitaa waqti way ka kiraysan karaan hoolka barafka. Dhammaan hoolalka barafka, saacadaha ay furan yihiin iyo wax kaloo badan ka hel goteborg.se ka raadi "ishall".

### Angered Arena

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 15

**Telefoonka:** 031-368 22 90

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/angeredarena

**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

### Hoolka barafka ee Kviberg Park

**Cinwaanka:** Kvibergs Port 6

**Maxaddada ugu dhaw:** Kviberg, Kvibergsskolan

# Hälsoteket (Hagaaji caafimaadka)

### Da' walba

**Lacag la'aan!**



Hälsoteket waxay ku taallaa Angered, Kortedala iyo Bergsjön. Waxaan halkan u joognaa adigaaga doonaya inaad caafimaadkaaga sii hagaajiso. Hälsoteket waxaad uga qeybgeli kartaa tababar kooxeed, koorsooyin, muxaadarooyin iyo dhaqdhaqaaqyo bulsho. Waxaan bixinnaa dhaqdhaqaaqyo dhismo gudeheed ama dibaddeeda ah iyo xagga intarnetka. Dhaqdhaqaaqyada qaar waxaa loogu talagalay haweenka, kuwana dadka LGBTQI-ga ah. Macluumaad ku saabsan dhammaan waxqabadyadayada waxaad ka heleysaa barnaamijka hadda socda. Qof walba waa la soo dhaweynayaa!

### Angered

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 10

**Telefoonka:** 031-365 11 44

**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

### Kortedala

**Cinwaanka:** Kortedala Torg 1

**Telefoonka:** 031-365 23 61

**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/halsotekeninordost

**Facebook iyo instagram:** halsotekeninordost



# Barkulanno

### 10–21 sano

**Lacag la'aan!**

Woqooyiga-bari ee Göteborg waxaa ku yaal goobo badan oo kala duwan oo ay ku kulmaan dhallinyaradu. Halkaas wuxuu qofku ku tijaabin karaa hawlo ku cusub, wuxuu ku hormarin karaa danihiisa, wuxuuna ka heli karaa saaxiibbo. Wuxuu tusaale ahaan qofku ku duubi karaa muusiko, ku sameyn karaa qoob-ka-cayaar, xujootan, wax ka aadi tamashleyn ama abaabuli karaa filin ku fiidsasho.

### Atom Studios

Atom Studios waa guri dhaqameed ay leeyihiin dhallinyaradu, looguna talagalay dhallinyarada, wuuna kuu furanyahay adigaaga jira 15-21 sano. Waxaad agteenna ka heleysaa qol-warbaahineed, istuudiyaha podcast-iga, istuudiyaha muusikada, qol DJ, istuudiyo qoob ka ciyaar, qol mashruuc iyo goobo xafladeyn. Gebi ahaanba waa lacag la'aan in ballan laga qabsado dhismayaasheenna, waxaadna ballanta ku qabsan kartaa inaad farriin noogu soo dirto Instagram-ka. Sidoo kale waxaad agteenna ku qabsan kartaa munaasabado ama mashaariic adiga kuu gaar ah, waxaadna lacag kasoo dalban kartaa Atompotten si aad fikradahaaga u hirgeliso. Markaan hadalka soo koobno waxaan kuu nahay meel adigaaga da' yarta ahi aad uga dhabeyn karto fikradahaaga, riyooyinkaaga iyo hal-abuurnimadaada.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 12, isla dhismada Blå Stället iyo Angeredsgymnasiet

**Telefoonka:** 072-856 51 86

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/atomstudios

**Instagram:** atomstudiosgbg

**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum



### Bagarns mötesplats

Loogu talagalay dhallinyarada 10-20 sano jirrada ah. Qeybta dhulka hoose ee dhismada waxaa ku yaal qol tababar oo ay wax walba u dhanyihiin iyo istuudiyo. Waxaa sidoo kale ku yaal kafateeriya yar.

**Cinwaanka:** Brahegatan 11
**Telefoonka:** 031-365 41 05
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/bagarns
**Instagram:** bagarns.motesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** SKF

### Bergsjögårdens mötesplats

Loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 10 ilaa iyo 20 sano. Agteenna waxaad kula kulmi kartaa saaxiibbo cusub, waxaad ku ciciyaari kartaa hoolkayaga ciyaaraha, waxaad geym ku ciyaari kartaa qolkayaga geymamka, istuudiyaheennana waxaad ku dhex duuban kartaa muusiko, waxaadna ku dhex qabsan kartaa hawlo kale oo xiiso leh. Waxaan ka shaqeynaa ka qaybgalka dhallinyarada iyo saamayntooda. Noola imaw fikradahaaga iyo aragtiyahaaga waannu ku hageynaa markaase.

**Cinwaanka:** Universumsgatan 37
**Telefoonka:** 031-365 46 57 ama 073-596 96 28
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/bergsjogarden
**Instagram:** bg_motesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** Atmosfärsgatan, Komettorget

### Bergums mötesplats

Loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada 10-18 sano jirrada ah. Shaqa hawleedkan waxaa loo kala qeybiyay koox da'eedyo kala duwan oo waqtiyo kala duwan oo maalintiiya ah. Waxaad halkan ku sameyn kartaa wax kasta laga billaabo la kulanka asxaabtaada ilaa iyo ka qeybgalka hawlo kala duwan sida soo saaridda muusika, geym ciyaaridda TV-ga, biilliardi, cashar caawin, wax dubid, ku tigeysiga gudaha iyo ciyaaro kale.

**Cinwaanka:** Lerumsvägen 24, Bergumskolan gudihiisa
**Telefoonka:** 070-785 12 51 ama 070-780 09 02
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/bergumsmotesplats
**Instagram:** bergums_fritidsgard
**Maxaddada ugu dhaw:** Olofstorp

### Gårdstens mötesplats

Loogu talagalay dhallinyarada 13-18 sano jirrada ah. Fikradahaaga iyo rabitaankaaga ayaa xukuma hawsha shaqada. Waxaa halkan laga helaa waxyaabo ay ka mid yihiin, tenniska miiska, playstation, ciyaaraha waqtiga leeskula qaato, kafateeriyo, qol filimada ah iyo meelo raaxa leh oo keliya waqti lagula qaadan karo asxaabta iyo shaqaalaha. Waxaa dhismada noogu yaal qol leh muraayado loogu talagalay kuwa raba inay qoob ka ciyaaraan.

**Cinwaanka:** Lagerbladsgatan 11
**Telefoonka:** 031-365 16 84 ama 072-856 73 25
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/gardstensmotesplats
**Instagram:** gardstens_motesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** Salviagatan







### GIA

GIA waxay ka dhigantahay Gays in Angered, waana barkulan aamin ah oo wadajir loola sameeyay dhallinyarada LGBTQIA-ga. GIA, waxaan rabnaa inay dadku ammaan ku heli karaan, wadajirna horuumar isugula sameyn karaan. Waa laguugu soo dhaweynayaa iyadoo aan taas loo eegeyn caqiiddadaada, qoomiyaddaada iyo inaad cuuryaan tahay in kale.

**E-mail:** gia@socialnordost.se
**Instagram**: gays_in_angered

### GUTS mötesplats – ee gabdhaha

Loogu talagalay gabdhaha iyo dadka jinsiga beddesha ee 13-20 sano jirrada ah. Waxaad halkan kula kulmi kartaa saaxiibbo cusub oo aad kala hadli karto, kalana sheekaysan karto waxyaabo muhiim kuu ah, waxaadna ku sameyn kartaa qoob ka ciyaari, xujootan, wax dubid, saaxiibbo la socosho, geym ciyaarid, filim daawasho ama wax kale oo aad u aragto in ay xiiso leeyihiin.

**Cinwaanka:** Linjespringarens väg 15 (Maqsinnada dugsiga sare ee Angered)
**Telefoonka:** 070-412 96 93
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/guts
**Instagram:** guts.motesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** Angered Centrum



## Hammarkullens mötesplats – Mixgården

Loogu talagalay dhallinyarada 13-20 sano jirrada ah. Waxaa halkan ka jira hawlo kala duwan sida ku hawlanaanta muusikada, qoob ka ciyaarka, kubbadda cagta, cunto karin, cashar caawin, qol warbaahineed aad lagu duuban karo podcast iyo DJ ama in laga qeyb qaato hawlo kooxeed aan horay loo qorsheyn.

**Cinwaanka:** Hammarkulletorget 63
**Telefoonka:** 031-365 26 87
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/mixgarden
**Instagram:** mixgardenhk
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen

## Hjällbo mötesplats

Loogu talagalay dhallinyarada 13-18 sano jirrada ah. Barkulanka Hjällbo waa meel ammaan ah oo soo dhaweyn leh oo loogu talagalay in ay dhallinyaradu ku kulmaan, waqti iskula qaataan, ugana qeybqaataan hawlo kala duwan sida tamashle, mashaariic hal abuur ah, aqoon-is-weydaarsiyo, mowduucyo fiidkii ah, ciyaaro iyo muusiko.

**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 79
**Telefoonka:** 031-365 27 34
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/hjallbomotesplats
**Instagram:** hjallbo_motesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** Hjällbo

**Waxqabadyo dheeri ah, fasaxyada iskoollada gudohooda.**
Fasaxyada iskoollada gudohooda waxaa had iyo jeer Göteborg ka jira waxyaabo badan oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada, maalinti iyo fiidki labadaba. Gal bogga kalendarium.goteborg.se si aad u aragto waxa ka socda aaggaaga iyo Göteborg oo dhan. Tusaale ahaan, raadi ”jullov” ama ”sommarlov”.





## Kooperativet Fjället

Loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada 12-20 sano jirrada ah. Waxaad halkan ku heli kartaa madadaalo, kula kulmi kartaa saaxiibbo cusub, kuna baran kartaa waxyaabo cusub. Kooperativet Fjället waxaa maamula urur. Adigaaga doonaya inaad dhaqdhaqaaqyada ka qaybqaato, aaddo tamashle iyo wax kaloo badan, waxaad bixineysaa kharashka xubinnimada ka dibna waad ka qaybqaadaneysaa hawlaha Fjället.

**Cinwaanka:** Fjällblomman 2
**Telefoonka:** 031-330 39 36
**Bogga intarnetka:** fjallet.org
**Instagram:** kooperativetfjallet
**Maxaddada ugu dhaw:** Rannebergen Centrum

## Lövgärdet mötesplats – Ungdomsgården

Loogu talagalay dhallinyarada 13-18 sano jirrada ah. Waxaad halkan ku sameyn kartaa wax kasta laga billaabo la kulanka asxaabtaada ilaa iyo munaasabad-abaabulid, horuumarinta aragtiyahaaga iyo dad la wadaagidda fikradahaaga iyo wax kaloo badan. Waxaan sidoo kale bixinnaa fursad ku aaddan CV-qoridda, cashar caawinta, horuumarinta hoggaaminta, horuumarinta daneynta, abuurista wadajirnimada iyo hagitaanka.

**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Telefoonka:** 031-365 32 52
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/lovgardetsmotesplats
**Instagram:** lovgardetsmotesplats
**Maxaddada ugu dhaw:** Lövgärdet Centrum

## MiniLövis


Loogu talagalay carruurta dhallinyarada 10-12 sano jirrada ah. Waxaan haynaa hawlo kala duwan sida farshaxanka, dubista iyo cashar akhrinta. Sidoo kale waad iska iman kartaa halkan si aad ula kulanto kuwa da'daada ah, ama si aad ula hadasho qof weyn oo shaqaalaha ka mid ah.

**Cinwaanka:** Vaniljgatan 23
**Telefoonka:** 076-719 53 43
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/minilovis
**Instagram:** minilovis_fritidsgard
**Maxaddada ugu dhaw:** Lövgärdet Centrum

## MiniMix

Loogu talagalay carruurta dhigata dugsiyada dhexe. Mix-ta yar waxaad ku heli kartaa caawimaad xagga casharrada ah, waxaad ku ciyaari kartaa geym, waxbaad ku dubi kartaa, filimo ayaad ku daawan kartaa, waxaad waqti kula qaadan kartaa kuwa da' daada ah, waxaadna kula hadli kartaa shaqaale iyo wixii la mid ah. Waxaad halkan ku ciyaari kartaa turub, waxbaad ku dubi kartaa, waad ku qoob ka ciyaari kartaa, waxaad ku ciyaari kartaa tennis-ka miiska iyo kubbada cagta ama waxaad ku samayn kartaa dhaqdhaqaaqyo dibadda ah.

**Cinwaanka:** Hammarkulletorget 62C
**Telefoonka:** 072-855 40 93
**Facebook:** HammarkullensMiniMix
**Instagram:** minimix_hammarkullen
**Maxaddada ugu dhaw:** Hammarkullen



### Mötesplats Radar

Loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada 10-20 sano jirrada ah. Radar ku yaal istuudiyaha qoob ka ciyaarka iyo muusikada, filmaanta/sawirrada, podcast-iga, qolka geymka, sanduuq madow, kafateeriya ay maamulaan dhallinyaradu, iyo qaar kaloo badan. Waxaan halkan ku dadaaleynaa inuu shaqa hawleedku noqdo mid ay hogaamiyaan dhallinyaradu - waxaan rabnaa inaan maqalno fikradahaaga. Noo imaw haddii aad rabto inaad billowdo podcast, duubato muusikadaada, ama rabto oo keliya inaad waqti iska qaadato!

**Cinwaanka:** Tideräkningsgatan 3
**Telefoonka:** 031-365 35 61
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/radar
**Instagram:** motesplats.radar
**Maxaddada ugu dhaw:** Kortedala Torg

### Unga påverkar

Ma tahay qof da' yar oo ma dooneysaa in lagaa taageero in la maqlo codkaaga ku aaddan wax aad u aragto inay muhiim yihiin? Markaa waad noo iman kartaa!

Unga påverkar waxay ka shaqeysaa in la kordhiyo saameynta carruurta iyo da'yarta, ka qeybgalkooda iyo fursadahooda saameynta. Waxaan taas sameynaa annagoo hor iyo horraan mareyna Angereds Ungdomsråd, Östra Göteborgs Ungdomsråd iyo shirar wadahadal oo dhex mara dhallinyarada iyo siyaasiyiinta, laakiin xitaa shaqaaleynta dhallinyarada sida Camp Demokrati iyo Unga stadsutvecklare.

Xafiiska Unga påverkar wuxuu ku yaallaa bartamaha Angered. Halkan waxaad la iman kartaa fikradahaaga ama waxyaabo aad isweydiineyso si aad taageero ugu hesho in codkaaga la maqlo. Waxaa sidoo kale jirta fursad lagu dalban karo lacag si fikradaha loo meelmariyo!

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 12, dhismooyinka Atom Studios
**Telefoonka:** 079-098 47 57 ama 072-143 81 03
**Instagram:** ungapaverkar





## Barkulanno iyo waxqabadyo loogu talagalay da' kasta

### Regnbågshuset



Regnbågshuset waa barkulan loogu talagalay qof kasta oo ka tirsan bulshada LGBTQI ee Göteborg. Waa goob loogu talagalay kulamada, isxilqaamidda, waqti isla qaadashada, macluumaad faafinta iyo abuuridda hal-abuurka. Waa lacag la'aan in la booqdo iyo in laga qabsado qolal kala duwan.

**Cinwaanka:** Barlastgatan 2 (Amerikahuset ee Masthugget gudihiisa)
**Telefoonka:** 031-365 00 48
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/regnbagshuset

### Ururro

Woqooyiga-bari ee Göteborg waxaa ka jira ururro badan oo leh waxqabadyo dhinacyo kala duwan leh, tusaale ahaan ciyaaro, hiddo iyo dhaqan, muusiko iyo cashar caawin.

Taageerada ururrada kala xiriir maamulka sooshaalka ee Nordost haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato ururrada jira, ama aad ku fikirayso inaad samaysato urur ama rabto inaad codsato deeqaha ururrada.

**Telefoonka:** 031-365 41 20 ama 031-365 26 72
**E-mail:** foreningsstod@socialnordost.goteborg.se

### Adigaaga naafada ah

Waxaa ka jira Göteborg dhaqdhaqaaqyo iyo ururro badan oo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee naafada ah.

Iskaangarey koodka QR-ka si aad wax dheeri ah u akhrisato Sidoo kale waad wactami kartaa ama e-mail ayaad diri kartaa haddii aad rabto inaad hesho macluumaad dheeri ah ama taageero.

**Telefoonka:** 031-367 98 08
**E-mail:** lotsforbarnochvuxna@funktionsstod.goteborg.se

**Hawlo loogu talagalay da' kasta iyo dan kasta.**

Magaalada Göteborg oo ay wehliyaan ururro badan waxay bixisaa hawlo badan oo kala duwan oo ku dhawaad mar walba lacag la'aan ah. Waxay yihiin wax walba laga billaabo muxaadarooyin, bakhtiyaanasiib iyo farsamada gacanta ilaa iyo ciyaaro iyo hiddo iyo dhaqan. Wixii aad waxaad ka daneyneysid ka raadso bogga kalendarium.goteborg.se.

# Talo iyo taageero

**Lacag la'aan!**

Mararka qaar nolosha carruur lahaanshadu ma fududa. In dad kale laga helo kaalmo, talo iyo taageero waa xuquuq aad isticmaali karto oo ay tahay inaad u isticmaasho dantaada iyo tan carruurta. Waxaa jira dad badan oo xaafaddaada ah oo raba inay adiga iyo qoyskaaga idinka caawiyaan xaalad kasta ee jirta. Waxaad halkan ka heleysaa macluumaad ku saabsan meelaha kala duwan ee taageerada bixiya. La xiriir qaar ka mid ah meelaha hoos ku qoran haddii ay kugu adagtahay inaad hesho mid sax ah.

## Medborgarkontor

Halkaan waxaad jawaab uga heli kartaa su'aalahaaga ku saabsan waxqabadyada degmada, tusaale ahaan iskoollada, daryeelka waayeellada ama horuumarinta magaalada. Si kal iyo laab ah ayaan u dhegeysaneynaa fikradahaaga iyo aragtidaada, waxaanna u sii gudbineynaa mas'uuliyiinta iyo siyaasiyiinta magaalada ka jooga aaggaaga. Waxaan sidoo kale kugu caawin karnaa in aan kuu sharraxno waxa ku qoran waraaqaha iyo go'aamada hey'adaha dowladda ama aan ku tusno sida aad u buuxineyso codsiyada iyo foomamka.

### Angered

**Telefoonka:** 031-365 17 20

**Cinwaanka:** Angereds Torg 13

**E-mail:** medborgarkontoret.angered@demokratimedborgarservice.goteborg.se

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/medborgarkontoretangered

### Bergsjön

**Telefoonka:** 031-365 41 00

**Cinwaanka:** Rymdtorget 8

**E-mail:** medborgarkontoret.bergsjon@demokratimedborgarservice.goteborg.se

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/medborgarkontoretbergsjon

**Vårdguiden 1177.se.** Cinwaanka Barn och graviditet hoostiisa waxaad ka akhrisan kartaa wax walba oo ku saabsan uurka, dhalmada iyo waalidnimada. Waxaa halkan ku jira xaqiiqooyin iyo talooyin ku saabsan caafimaadka, korriinshada, xuquuqda iyo daryeelka carruurta.

Talo iyo taageero



da'doodu u dhexeyso 0-18 sano? Waxaan bixinnaa talooyin khadka taleefoonka ah, wadahadallo qofka u gaar ah iyo kuwo aan u qabanno kooxo-waaliddiin ah oo kala duwan. Haddii aanan kuu jawaabin, farriin noo dhaaf si aan kuu soo wacno.

Waxaa woqooyiga-bari ee Göteborg ka jira laba khad oo qoys, labaduba waxay bixiyaan taageero iyo tilmaamooyin isku mid ah oo loogu talagalay qoysaska. La xiriir khadka qoysaska ee aagga aad deggantahay.

### Loogu talagalay adigaaga deggan Angered

**Telefoonka:** 031-365 23 28 iyo 076-527 12 13

**E-mail:** resursenheten.barn.och.unga.angered@socialnordost.goteborg.se

### Loogu talagalay adigaaga deggan Bergsjön, Gamlestaden, Kortedala iyo Utby

**Telefoonka:** 073-651 35 58

**E-mail:** familjelinjen@socialnordost.goteborg.se

### Teleefoonka waalidka ee loogu talagalay adigaaga leh carruur dhallinyaro ah

Ma ka welwelsantahay kuraygaaga ama qof kale oo da' yar ah oo agagaarkaaga jooga? Waaliddiinta, qaraabada iyo dadka kale ee waaweyn ee ku xeeran da'yartu waxay wici karaan khadka teleefoonka ee waaliddiinta si ay u helaan taageero iyo hagitaan. Halkan waxaad kala hadli kartaa shaqaale bulsho oo khibrad u leh la kulanka dhallinyarada ku lugta leh dhibaatooyinka.

Wax walba waa lacag la'aan, qof walbana waxaa saaran waajib sir qarin. Waad is qarin kartaa haddii aad rabto. Farriin noo dhaaf si aan ugu dambayn kuu soo wacno maalinta xigta ee shaqada.

**Telefoonka:** 031-367 96 14

**Bogga intarnetka:** goteborg.se/foraldratelefon

**Iskaangarey koodka QR-ka ee akhriso waxa ku aaddan taageerada Göteborg ka jirta ee adiga laguugu talagalay ka waalid ahaan.**

**Badbaadi carruurtu waxay ka waalid ahaan kuu haysaa talooyin iyo dhiirrigelin. Iskaangarey koodka QR-ka ee wax badan ka akhriso!**

## Taageerada waaliddiinta

**Familjelinjen (khadka qoysaska)**
Ma u baahantahay inaad ka hadasho wax la xiriira xaaladda qoyskaaga? Ma qabtaa su'aalo ku saabsan waalidnimadaada ama ubadkaaga

**Waalidnimada nolol maalmeedka.** Gobalka Västra Götaland wuxuu cilmi baaris hadda jirta kasoo ururiyay talooyin iyo tilmaamooyin kaa caawin kara xoojinta waalidnimadaada. Boggooda intarnetka ayaad tusaale ahaan ka heli kartaa tilmaamooyin ku saabsan sida uu wadahadal wanaagsani u ekaan karo, sida aad amar u siin karto cunuggaaga adiga oo aan xanaaqin iyo siyaabo kala duwan oo aad ilmahaaga ugu taageeri karto iskoolka. Iskaangarey koodka QR-ka ee wax badan ka akhriso!



Talo iyo taageero

## Sooshaalka woqooyiga-bari ee Göteborg

Sooshaalka waxaad, ka waalid ahaan, ka ag heli kartaan talooyin iyo taageero loogu talagalay adiga iyo ilmahaaga labadaba, si aad ugu noolaataan nolol ammaan ah oo madaxbannaan. Waxaan ku siineynaa taageero iyo badbaado haddii, tusaale ahaan:

- aad u baahantahay caawimaad ku aaddan maareynta xiriirka ama kala tagidda waalidka kale
- uu wada-xiriirku idinku adagyahay ama ruutiin maalmeedku oo aad mar walba isku dhacdaan adiga iyo ilmahaagu
- aad ka walaacsantahay xaaladda nololeed ee ilmaha ama qof dhallinyaro ah
- aad u baahantahay in lagaa caawiyo hoy la'aan degdeg ah
- ay ku haysato dhibaato dhaqaale ama aadan is masruufi karin
- aad ku sugantahay xaalad qoys oo uu qofi khatar ugu jiro in ay waxyeello gaarto
- aadan dareemeyn ammaan, iyadoo ay tusaale ahaan sababtu tahay, rabshad, hanjabaad ama xakameyn
- aad u baahantahay taageero oo aad si xun u isticmaasho daroogo ama khamri
- aad rabto in lagaa taageero ka bixidda nolosha dembiilanimada.



Talo iyo taageero

## Wuxuu sooshaalku bixiyaa noocyo kala duwan oo taageero ah

Tan caadi ahaan ugu badan waa in wadahadal lala yeesho qoyska oo lagala heshiiyo taageerada qoyska ku habboon. Sooshaalku wuxuu aqoon gaar ah u leeyahay baahida carruurta iyo dhallinyarada. Waa in ay had iyo jeerba dhegeystaan carruurta si ay wax u noqdaan sida ugu wanaagsan iyaga ee suurtogalka ah. Wuxuu sooshaalku u aragyaa in ay waalidiintu yihiin kuwa ugu muhiimsan carruurta, waxayna rabaan inay taageeraan oo ay xoojiyaan qoyska si ay u xalliyaan xaaladdooda. Waxay taasi noqon kartaa wadahadal taageero, kulamo waalid (eeg bogga 37) ama qoys-daweyn. Xagga carruurta, waxaa jiri karta fursad ay ku heli karaan qof xiriiriye ah ama ay kula kulmaan carruur kale oo isku xaalad ku jiraan

## Qof kasta waa ay raadsan karaa taageero iyo badbaado

Haddii aad u baahantahay taageero ama badbaado, waxaad codsi usoo gudubsan kartaa sooshaalka, waxaadna uga warrami kartaa xaaladdaada. Carruurta iyo waalidkuba way la xiriiri karaan sooshaalka si ay u helaan caawimo iyo taageero. Wac xarunta xiriirka ee u sharrax waxa aad u baahantahay in lagaa caawiyo, si markaa laguugu hagaajiyo waaxda saxda ah.

**Telefoonka:** 031-365 00 00.

## Haddii uu jiryo welwel laga qabo canug

Qof kasta oo ka shakiya in uu canug dhibaato ku jiryo wuxuu welwelka uu qabo ee ku aaddan ilmaha u gudbin karyaa sooshaalka. Taas micneheedu maaha inuu, tusaale ahaan, qofku dacweynayo waalidka, ee wuxuu gudbinayaa welwel uu ka qabo canug. Haddii shaqaalaha dugsiyada xannaanada, iskoollada ama heyadaha caafimaadku ay ka shakiyaan inuu ubad dhibaato ku suganyahay, waxaa waajib ku ah inay taas ku wargeliyaan sooshaalka. Wuxuu sooshaalku markaas la xiriiriyaa qoyska, waxayna wadajir isula eegayaan haddii uu qoysku u baahanyahay taageero, haddii ay sidaas tahayna nooca taageerada ee ay u baahanyihiin.

## Akhriso wax dheeri ah oo ku saabsan sooshaalka

Waa wax caadi ah in la dareemo welwel marka lala xiriirayo sooshaalka, ama inaan la hubin caawimaadda laga heli karo nooca ay tahay. Bogga kollpasoc.se waxaa ku jira macluumaad badan oo ku saabsan sida uu sooshaalku u shaqeeyo iyo sida ay wax u dhacaan marka lala xiriiro.



## Waxaan bixinnaa taageero waalid oo kala duwan oo koox ahaaneed:

- **ABC (Alla Barn i Centrum, carruurta oo dhan ayaa diiradda lagu saarayaa)** – loogu talagalay adigaaga leh ilmo 3-19 sano jir ah. Ka dhig in xiriirku shaqeeyo oo uu sii xoogeysto, ka hortag isku dhacyada, yareyne qeylada, dooro dagaalka, ka waalid ahaanna maarey istereeska iyo carada.
- **Trygghetscirkeln (Wareegtada kalsoonida)** – loogu talagalay adigaaga haysta carruur 0-6 sano jir ah. Xooji xiriirka aad la leedahay ilmahaaga oo hel farsamo aad ku aragto, ku fahanto, ugana jawaabto baahida iyo hab-dhaqanka ubadka si aad kor ugu qaato kalsoonid-iisa/eeda.
- **BiFF (Barn i Föräldrars Fokus, Carruurta oo ay waalidku Diiradda saaraan)** - loogu talagalay waaliddiinta aan wada nooleyn ee uu khilaafku ka dhexeeyo. Caawin ku aaddan muujinta baahida ilmaha iyo xaaladdooda. Sida ay waaliddiintu wax ugu fududeyn karaan ilmahooda.
- **LFT (Ledarskapsträning För Tonårsföräldrar, Hoggaaminta iyo Waaliddiinta Da'yarta)** – loogu talagalay waaliddiinta dareemaya welwel ku aaddan kuraygooda. Caawimaad iyo farsamooyin la taaban karo oo ay ku joojin karaan qaabka xun ee ay wax u socdaan, kuna xoojin karaan xiriirka ay la leeyihiin kuraygooda.
- **De otroliga åren (Sannadaha cajiibka ah)** – loogu talagalay adigaaga haysta carruur 3-9 sano jir ah. Si fiican u fahan ubadkaaga, niyadjabkaagana si fiican u maarey ka waalid ahaan. Cunugga bar inuu ku maqlo oo uu maareeyo xasarad badnaanta, hab-dhaqanka aan loo meel dayin iyo dhibaatada xagga saaxiibba helidda.

## Heeganka sooshaalka ee magaalada Göteborg

Sooshaalka heeganka ku jira wuxuu ku siinayaa gargaar degdeg fiidadki, habeennadi iyo maalmaha fasaxa ah. Waxa lagaa gargaarayo waxay noqon karaan wax ku saabsan rabshado, si xun wax u isticmaalid, hoy ama haddii aad ka shakisantahay in uu qofi khatar ku suganyahay.

**Telefoonka:** 031-365 87 00
**Cinwaanka:** Stora Badhusgatan 14, Göteborg

## Taageerada waalidka - Hawlaha gurmadka

Loogu talagalay adigaaga leh carruur 0-18 sano jir ah. Waxaad iman kartaa halkan haddii aad qabto fikrado iyo su'aalo ku saabsan carruurta iyo waalidnimada. Waxaa na saaran waajib sir qarin, mana jiraan wax aan diiwaangelineyno. Halkan, waxaad ka waalid ahaan kula hadli kartaa qof, haddii aad tusaale ahaan dareemeyso inaadan hubin sida ugu wanaagsan ee aad u taageeri karto ilmahaaga, aad ka welwelsantahay sida uu ilmahaagu ku yahay iskoolka ama dugsiga xannaanada, uu khilaaf badan idin dhex maro adiga iyo ilmahaaga, ama aadan xaaladda guriga ka dhigi karin mid sida aad rabto u shaqeyso. Waxaad ilaa iyo shan jeer wadahadal lacag la'aan ah la yeelan kartaa waalid caawiye.

Iskaangarey koodka, si aad u aragto sida uu sooshaalka Göteborg u shaqeeyo.



# Ilmahaaga ma ku adagtahay inuu iskoolka aado?

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin in ay si nabad ah iskool ku dhigtaan oo wax loogu dhigo si iyaga ku habboon. Haddii uu ilmuhu billaabo inuu muujiyo calaamado ah inuusan dooneyn inuu aado iskoolka, uu u aragyo in ay wax aad ugu adagyihiin, aad ugu fududyihiin ama uusan meesha ku faraxsaneyn waxaa jira wax badan oo aad, ka waalid ahaan, sameyn karto si aad canugga u caawiso. Muhiim baad adigu tahay!

## Waqti hore ogaw ee tallaab qaad

- Isla marka aad dareento in ilmahaagu aanu dooneyn in uu aado iskoolka, si dhab ah u qaado calaamadaha ilmahaaga oo isku day inaad ogaato waxa taas keeni kara.
- Iskoolka u sheeg waxa aad dareentay.
- Dad xaaladda xirfad u leh caawimaad ka raadso haddii loo baahdo.

## Sideed u taageeri kartaa ilmahaaga?

- Isxilqaan, muujina inaad daneyneyso iskool dhigashada ilmahaaga.
- Indhaha u soo jiid oo ayid waxa si fiican ugu socda oo uu ku fiicanyahay ilmahaagu.
- Ku caawi ilmahaaga hab-raac wanaagsan oo ku aaddan hurdada, cuntada, waqtiga shaashadda iyo dhaqdhaqaaqa jirka.
- Ka caawi canuggaaga maareynta welwelka iyo cadaadiska.
- Tus inaad dareemeyso inay xaaladdu adagtahay.
- Ku dhiirri geli ilmaha inuu sameeyo waxyaabo xiiso iyo nasasho leh waqtiga firaaqada.
- Ku taageer ilmahaaga inuu qabto hawlaha yaryar ee looga rabo iskoolka.
- Haddii aad adiga naftirkaagu dareento cadaadis ama welwel, wax ka qabo dareenkaas iyo naftaadaba.
- Muuji inaad rabto inaad wada shaqeyn fiican la yeelato iskoolka ilmahaaga.
- Si cad u muuji inaad rejeyneyso inuu ilmahaagu joogo iskoolka.
- Aqbal taageerada jirta.

## Inteed la xiriiri kartaa?

- La xiriir macallinka ilmahaaga ama shaqaalaha kale ee iskoolka ee aad ku kalsoontahay
- Ha ku caawiyaano caafimaadka ardayda ee iskoolka ilmahaagu (maamulaha, la taliyaha arrimaha bulshada, kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka, macallin takhasus gaara leh, cilmi-nafsiyahan, taqtarka iskoolka)
- La xiriir rugta caafimaadka
- La xiriir lataliyayaasha waalidka/ taageerayaasha waalidka ee sooshaalka

Ma rabtaa inaad wax badan ogaato? Gal bogga **goteborg.se/foraldrastod** si aad wax uga hesho talooyin badan oo ku saabsan sida aad waalid ahaan u taageeri karto ilmahaaga.



## Ka waalid ahaan xiriirro ma la leedahay xirfadlayaal badan oo ku shaqa leh ilmahaaga?

Haddii aad qoys ahaan xiriirro la leedihiin meelo kala duwan, waxaa noqon kara wax qiimo badan in la kulmo oo la sameeyo qorshe isku duwid (SIP) oo ku saleysan baahida ilmaha. SIP wuxuu habboonaan karaa marka uu ilmahaagu isku mar caawimaad uga baahanyahay tusaale ahaan, iskoolka, sooshaalka ama hey'adaha caafimaadka. SIP wuxuu keenayaa in adiga iyo qaraabadaadu aad ka qaybqaadan kartaan qorsheynta caawimaadda uu ilmahaagu heli doono. Adiga naftirkaagu, ka waalid ahaan, waad codsan kartaa SIP, waydii mid ka mid ah dadka aad la xiriirto.

## Rugaha qaabilaadda cilmu-nafsiga waalidnimada iyo carruurta yaryar

Loogu talagalay adigaaga dareemaya inaad u baahantahay taageero iyo talo ku saabsan waalidnimadaada oo ka dheeri ah taageerada aad ka heleyso rugta umulisooyinka, rugta daryeelka carruurta iyo xarunta qoysaska. Waxaad nagala soo xiriiri kartaa arrimo tusaale ahaan la xiriira:

- welwel ku saabsan waalid noqoshada
- sida aad waalid noqoshada ku dareemayso
- marka ay waalidnimadaadu qalaq kugu hayso
- hab-dhaqanka iyo korriinshada ubadkaaga
- dhacdooyin qoyska gudihiisa ah oo idin saameynaya adiga iyo ilmahaaga.

Waxaan koox-koox ahaan iyo qof-qof ahaan ula kulannaa dad waalid noqon raba, carruur da'deedu u dhexeyso 0-5 sano iyo waalidiintooda. Waxaa marka hore, mid ka mid ah cilmi-nafsiyahannada, kugu soo xiraya rugta daryeelka carruurta ama rugta umulisooyinka. Sidoo kalena waa noola soo wacan karaa si toos ah. Booqashooyinku waa lacag la'aan.

**Gamlestaden**
**Telefoonka:** 031-747 97 88
**Angered Centrum**
**Telefoonka:** 031-747 97 87

## Stella

Halkaan waxaad taageero ka heli kartaa marka canuggaaga lagu meeleeyo meel ka baxsan gurigiisa. Stella adiga ayey ka waalid ahaan kuu shaqeyneysaa. Waxaan tusaale ahaan kuu ahaan karnaa taageero marka aad la kulmeysid sooshaalka ama waxaan kaa caawin karnaa inaan kula akhrinno qoraallada iyo dukumiintiyada ku saabsan meelaynta ilmahaaga. Waxaad sidoo kale ka hadli kartaa sida aad tahay iyo waxa aad dareemeyso. Haddii aysan cidna jawaabin waxaad noo dhaafi kartaa farriin si aan taleefanka dib kaaga soo wacno.

**Telefoonka:** 031-366 21 38 och
031-366 30 72

**E-mail:** stella@goteborg.se

Talo iyo taageero

### Familjerådgivning

La-talinta qoysasku waxay bixiyaan wadahadal ku aaddan lamaanayaasha iyo qoysaska u baahan in laga caawiyo wax ka qabashada dhibaatooyinka xiriirkooda. Waa idinka naftirkiinna cidda go'aamineysa inaad rabtaan inaad raadsataan la-talin iyo kale. La-taliyayaasha qoysaska waxaa saaran waajib sir qarin, wax diiwaan gelin ahna ma sameeyaan. Waxaad gebi ahaanba ahaan kartaan qarsoodi.

**Cinwaanka:** Kronhusgatan 2G
**Telefoonka:** 031-367 93 63
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjeradgivningen

### Familjerättsbyrån (Xafiisyada Xeerka Qoyska)

Kuwiinna ay carruurtu u dhalato ee aan is qabin waa inaad xaqiijisaan waalidnimada. Waxaad taas ku sameyneysaan xafiisyada xeerka qoyska. Xafiisyada xeerka qoysku waxay sidoo kale waaliddiinta doonaya inay isfuraan ka caawiyaan inay heshiiyaan iyo in ay kala saxiixdaan heshiis ku aaddan, tusaale ahaan, mas'uuliyadda, hoyga iyo waqti la qaadashada ilmaha.

**Cinwaanka:** Olof Palmes Plats 1
**Telefoonka:** 031-367 92 00
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/familjerattsbyran

### Familjestödsenheten Ågrenska

Loogu talagalay qoysaska leh carruur, kurayo iyo da'yar qaangaar ah oo qaba dhibaatooyin xagga wax diirad saaridda, feejignaanta, iska sameynta, waxbarashada, qasbanaan ama hab-dhaqanka ah. Waxaan tusaale ahaan bixinnaa talo taleefanka ah, wadahadal taageero, muxaadarooyin iyo waxbarasho waalid.

**Cinwaanka:** Järnbrotts Prästväg 2
**Telefoonka:** 070-822 50 96

### Hagid loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah

Carruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah waxay badanaa u baahanyihiin noocyo taageero oo kala duwan. Tusaale ahaan dadaallada daryeelka caafimaadka, qalab-gargaar, xaalad waafajin guri, adeeg safar ama in loo taageero sida uu qabo LSS (Xeerka taageerada iyo adeegga dadka naafada ah qaarkood) iyo SoL (Sharciga Adeegyada Bulshada). Waxaan kugu hageynaa meesha saxda ah. Waad nasoo wici kartaa ama ballan booqasho ayaad qabsan kartaa, haddii aad u baahantahay turjubaanna waan kuu qabaneynaa.

**Cinwaanka:** Slottsskogsgatan 12
**Telefoonka:** 031-367 98 08
**E-mail:** lotsforbarnochvuxna@funktionsstod.goteborg.se
**Bogga intarnetka:** goteborg.se/lotsforbarnochvuxna



### Taageerada xigtada

Taageerada xigtada waxaa loogu talagalay adigaaga taageeraya qof xigto kuu ah oo sabab cudur, si xun wax u isticmaalid, qabatimid, cuuryaannimo jireed ama maskaxeed awgeed, u baahan taageeradaada. Ka xigto ahaan aadbaad muhiim u tahay, dadaalka aad sameysana waa muhiim. Mararka qaar xitaa adiga ayaa taageero u baahan kara. Taageerada xigtadu waxay bixisaa wadahadal qofka u gaar ah ama koox ahaaneed, macluumaad, talo iyo hagitaan.

**Taageero xigto oo loogu talagalay adigaaga taageeraya qof da'diisu ka hooseyso 65 sano:**
**Telefoonka:** 031-365 50 30
**E-mail:** anhorigstod.under.65@funktionsstod.goteborg.se

**Taageero xigto oo loogu talagalay adigaaga taageeraya qof da'diisu ka sarreyso 65 sano:**
**Telefoonka:** 031-365 14 16
**E-mail:** anhorigkonsulent.nordost@aldrevardomsorg.goteborg.se

# Taageero loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada

### Fältgruppen

Fältgruppen (kooxda goobtu) waxay joogaan meesha ay dhallinyaradu joogto si ay ula hadlaan, u siiyaan talo iyo taageero, una abuuraan jawi ammaan ah. Xoghayayaasha goobtu waxay booqdaan iskoollada, jardiinooyinka xilliga firaaqada, jidadka iyo suuqa. Waxaan dibadda joognaa galbihii, fiidadkii iyo maalmaha fasaxa. Haddii aad ka welwelsantahay qof dhallinyaro ah, waad nala soo xiriiri kartaa. Waxaan sidoo kale ka shaqeynaa inaan la kulanno waaliddiinta, waxaanna wada shaqeyn la leennahay sooshaalka iyo booliska.

**Cinwaanka:** Linjespringarens väg 15
**Telefoonka:** 031-365 16 82
**E-mail:** faltgruppen.angered@socialnordost.goteborg.se
**Cinwaanka:** Kortedala Torg 1
**Telefoonka:** 0722-55 83 77
**E-mail:** faltgruppen.ogbg@socialnordost.goteborg.se

### UngNordost

Ma dareemeysaa welwel ku aaddan in uu kuraygaagu lugaha la galyay daroogo ama dembiyo? Miyuu isaga tegay iskoolka mise wuxuu qabaa dhibaato kale oo nolol maalmeedka ku adkeyneysa? Haddii ay sidaas tahay waxaad la xiriiri kartaa UngNordost oo ah meel loogu talagalay dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 10 ilaa iyo 25 sano. Waxaan iskaashi la leennahay meelo kala duwan si aan si wadajir ah kurayga ugu helno taageero sax ah oo socon karta ilaa waqti fog. Qaar ka mid ah dadaalladayada, waxaad u baahantahay inaad kaalmo dhaqaale ka codsato sooshaalka. Haddii aadan halkaas xiriir la lahayn, waxaan kaa caawin karnaa inaad taa codsato.

**Telefoonka:** 031-365 21 62 ama 031-365 12 60
**E-mail:** ung.angered@socialnordost.goteborg.se
**Telefoonka:** 031-365 44 32 ama 031-365 43 44
**E-mail:** ung.ost@socialnordost.goteborg.se

## Ungas Psykiska Hälsa (UPH) (Caafimaad darrada maskaxda ee da'yarta)

Carruurta iyo da'yarta 6-17 sano jirrada ah ee qaba caafimaad darro xagga maskaxda ah oo fudud ama dhexdhexaad ah waxay caawimaad ka heli karaan UPH. Waxay tusaale ahaan noqon karaan dhibaatooyinka hurdada, welwelka, walbahaarka, niyad-jabka ama dhibaatooyin la xiriira cadaadiska. UPH waxay leedahay koox bixisa la-talin, qiimeyn iyo daweyn iyo sidoo kale taageero waalid iyo wadahadal qoys. Rugta caafimaadka ayaa xitaa gacan ka geysan karta sii gudbinta. UPH-ga kuugu dhaw wuxuu ku yaallaa Omtanken Kviberg.

**Omtanken Kviberg**
**Cinwaanka:** Anna Branzells gata 30
**Telefoonka:** 031-380 48 44

## Barn- och ungdomspsykiatrisk mottagning (BUP) (Rugta caafimaadka ee maskaxda carruurta iyo dhallinyarada)

Rugta BUP-ka ee Gamlestaden waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka hooseyso 18 sano ee leh calaamadaha nafsiga sida welwel, niyad-jab, habdhaqanka maagidda, dhibaatooyin bulshaynimo, hab-dhaqan qasbanaya iyo qalqal cunto. BUP-tu waxay sidoo kale sameysaa baaritaanno ku saabsan cuuryaannimada qaarkeed, sida ADHD iyo autism. Si aad taageero uga hesho BUP, waxaad u baahantahay in ay ku soo gudbiyaan hey'adaha caafimaadka, daryeelka caafimaadka iskoollada ama rugta dhallinyaradu.

**Cinwaanka:** Väverigatan 13
**Telefoonka:** 031-342 02 01
**Xiriiriye:** 031-342 10 00

## BUP-akuten

Haddii ay carruur ku timaado xaalad maskaxeed oo degdeg ah fiidkii, habeenkii iyo maalmaha fasaxa, la xiriir qeybta degdegga ee BUP-ta ee Sahlgrenska, Isbitaalka bari.

**Cinwaanka:** Vitaminvägen 17
**Telefoonka:** 031-343 55 44

**Waddo Gasha.** Xarun lala xiriiro oo ay shaqadeedu tahay ka caawinta carruurta iyo dhallinyarada qaba caafimad darrada maskaxdu inay helaan daryeelka saxda ah. Ku soo dhawaw inaad la xiriirto Waddo Gasha haddii:

- » aad tahay 17 sano jir ama ka yartahay oo aadna fiicneyn maskax ahaan
- » aad waalid ama xigto u tahay canug aan maskax ahaan fiineyn
- » aadan ogeyn halka ay tahay inaad la xiriirto si aad caawimaad u hesho.

**Telefoonka:** 010 435 86 50
Qofku isaga ayaa isi soo gudbin kara isagoo soo maraya 1177. Raac koodka QR-ka ee wax dheeri ah akhriso.







## Mini-Maria

Mini-Maria Göteborg waxaa loogu talagalay dhallinyarada iyo da'yarta qaangaarka ah ilaa iyo 21 sano ee qaba su'aalo ama walaac la xiriira khamriga ama daroogada, iyo sidoo kale waaliddiintooda ama xigtadooda. Waxaad iman kartaa Mini-Maria keligaa ama adiga iyo ilmahaaga. Mini-Maria waxaa ka shaqeeya cilmi bulshayahanno, kalkaalisooyin caafimaad, cilmi-nafsiyahanno iyo taqaatiir. Booqashooyinka Mini-Maria oo dhan waa lacag la'aan.

**Cinwaanka:** Väverigatan 13
**Telefoonka:** 031-367 92 90
**Bogga intarnetka:** minimaria.se

## Ungdomsmottagningen

Ungdomsmottagningen (rugta qaabilaadda dhallinyarada) waxaa loogu talagalay dhallinyarada u dhexeyso 13 iyo 24 sano jirka. Halkan, waxay dhallinyaradu uga hadli karaan wax kasta, laga billaabo jeceyl iyo dhacdooyin ad-adag ilaa iyo galmo iyo fikrado la xiriira nolosha, waxay isaga baari karaan uur, waxayna ku sameyn karaan wax kaloo badan. Waxay dhallinyaradu ka heli karaan dawo iyo daweyn maskaxeed iyo sidoo kale taageero iyo macluumaad. Waxaa rugta qaabilaadda ka shaqeeya umuliso, kalkaaliye caafimaad, lataliye arrimo bulsho, cilmi-nafsiyahan iyo taqtar guud oo takhasus leh. Xarunta qaabilaadda dhallinyaradu waxay haysataa shahaaddada LGBTQ.

**Angered**
**Cinwaanka:** Angereds torg 5B
**Telefoonka:** 010-435 81 50
**Bogga intarnetka:** vgregion.se/goteborgumangered

**Gamlestaden**
**Cinwaanka:** Väverigatan 13
**Telefoonka:** 010-435 81 60
**Bogga intarnetka:** vgregion.se/goteborgumgamlestaden

# Meelo badan oo aad la xiriiri karto si aad taageero u hesho

Meelahaas waxaa ka socda hawlo aad kula kulmi karto dadka kale oo aad isku xaalad tihiin.

### BRIS – Barnens rätt i samhället (Xuquuqda carruurta ee bulshada dhexdeeda)

**Khadka caawinta carruurta:** 116 111, wuu furanyahay 24 saac maalintiiba
**Taleefanka dadka waaweyn ee xagga carruurta:** 077-150 50 50, maalmaha shaqada laga billaabo 9 subaxnimo ilaa iyp 12 galabnimo
**Bogga intarnetka:** bris.se

### Mind

Halkan waxaad ka heli kartaa caawimaad haddii adiga ama qof aad taqaan uu ku fikirayo inuu isdilo. Waxaan halkan u joognaa inaan ku dhegeysanno oo aan kugula hadalno halka aad nolosha ka joogto. Waxaan rabnaa inaan ku siinno taageero, rejo iyo dhiirrigelin aad ku rabooto inaad noolaato iyo/ama raadsato caawimo.

**Telefoonka:** 90 101
**Bogga intarnetka/chatt:** mind.se

### Maskrosbarn

Loogu talagalay dhallinyarada 13-19 sano jirrada ah ee leh waalid aad khamri u caba, daroogo cuna, dhimirka ka buka ama da' yarta u geysta dhibaato maskaxeed ama jireed.

**Cinwaanka**: Sten Sturegatan 36
**Telefoonka:** 076-721 02 59
**E-mail:** goteborg@maskrosbarn.org
**Bogga intarnetka:** maskrosbarn.org/goteborg

### Bojen

Bojen waxaa loogu talagalay carruur iyo dhallinyaro cunfi kula kulmay guriga iyo waaliddiintooda iyagana loo geystay cunfiga.

**Cinwaanka:** Första Långgatan 22
**Telefoonka:** 031-15 01 30
**E-mail:** bojen@bojengoteborg.se

### Bona Via

Bona Via waxay soo dhaweyneysaa carruurta iyo dhallinyarada uu qoyskooda ku jiryo qof weyn oo aad khamri u cabba ama isticmaala daroogooyin kale. Halkaan waxaa jooga kooxo carruur ah, kooxo dhallinyaro ah iyo kooxo waaliddiin ah intaba.

**Cinwaanka:** Södra Allégatan 13
**Telefoonka:** 031-13 77 02
**E-mail:** info@bonavia.se
**Bogga intarnetka:** bonavia.se

### Gyllingen

Gyllingen, oo qeyb ka ah ururka samafalka ee Gyllenkroken, waxay taageero siisaa carruurta iyo dhallinyarada uu qof qoyskooda ka mid ahi qabo caafimaad darro xagga dhimirka ah ama cudur. Koox carruur yar-yar ah oo loogu talagalay waaliddiinta iyo carruurta. Kooxo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo da'yarta qaangaarka ah, taageerada waalidka iyo wadahadal qof ahaaneed.

**Cinwaanka:** Garverigatan 2
**Telefoonka:** 031-80 89 92
**Hemsida:** gyllenkroken.se/gyllingen



Talo iyo taageero

### Randiga Huset

Randiga Huset wuxuu taageero siiyaa carruurta iyo qoysaska uu ka dhimanayo ama ka dhintay qof muhiim u ahi.

**Cinwaanka:** Sankt Pauligatan 33A
**Telefoonka:** 077-440 00 05
**E-mail:** info@randigahuset.se
**Bogga intarnetka:** randigahuset.se

### Solrosen – Göteborgs Räddningsmission

Solrosen waxay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyni ku cabbirayaan dareenkooda iyo waxa ay ku fikirayaan haddii xubin qoyska ka mid ah laga qaado xorriyadda (la qabto, xabsi la dhigo, la xiro).

**Cinwaanka:** Andra Långgatan 19
**Telefoonka:** 031-712 13 10
**E-mail:** solrosen@raddningsmissionen.se
**Bogga intarnetka:** raddningsmissionen.se/solrosen

### Haddii uu jiro cunfi ka dhex dhaca xigtada

*Cunfi waa fal kasta oo lagula kaco qof kale, kaas oo u keenaya dhaawac, xanuun, cabsi ama bahdil, keenaya in qofkani uu sameeyo wax ka soo horjeeda rabitaankiisa ama uu ka baaqsado inuu sameeyo wax uu rabo.*
– Per Isdal, laga soo xigtay Meningen med våld, 2001

Adiga ama ilmahaaga ma la idiin geystay cunfi ama adiga naftirkaagu ma adeegsatay cunfi ama hanjabaad? Waxaad taageero iyo caawimaad u heli kartaa siyaabo kala duwan. Adigaaga si uun ula nool cunfi, waa inaad marka hore la xiriirtaa xafiiska sooshaalka ee xaafaddaada haddii aad rabto inaad hesho talo iyo caawimaad. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa heeganka sooshaalka haddii aad u baahantahay caawimaad degdeg ah marka uu xiranyahay xafiiska sooshaalku. Hoos ka eeg macluumaadka xiriirka, xog dheeri ahna ka eeg bogga **goteborg.se/valdochhot.**

### Haddii ay jirto balwad

Haddii adiga ama qof kale oo weyn oo qoyska ka mid ah ay balwadi dhibaato ku hayso, waxaa jira caawimaad iyo taageero la heli karo. Magaalada Göteborg waxaa ku yaal dhowr meelood oo aad la xiriiri karto haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahantahay talo iyo taageero. Waxay wuxu noqon karaan khamri, daroogo ama qamaar, laakiin waxay sidoo kale ku saabsanaan karaan noocyo kale oo balwad ah. Hoos ka eeg macluumaadka xiriirka, xog dheeri ahna ka eeg bogga goteborg.se.

### Kooxda daaweynta dhibaatooyinka daroogada

**Telefoonka:** 031-367 92 92

### Respons (ka jawaabidda talabixinta khamriga)

**Telefoonka:** 031-367 92 47

### Spelberoendeteame (Tiimka Qabatinka Qamaarka)

**Telefoonka:** 031-367 92 60

### Socialkontoret (Xafiiska sooshaalka ee aaggaaga magaalada)

Wac xarunta xiriirka si ay kuugu tilmaamaan meesha saxda ah.
**Telefoonka:** 031-365 00 00

**Socialjouren (Heeganka sooshaalka)**
**Telefoonka:** 031-365 87 00 (waqtiga ka baxsan waqtiyada xafiiska)

**Kriscentrum för kvinnor (Xarunta dhibaatooyinka dumarka)**
**Telefoonka:** 031-367 93 80

**Kriscentrum för män (Xarunta dhibaatooyinka ragga)**
**Telefoonka:** 031-367 93 90

**Kvinnofridslinjen (Khadka Nabadda Haweenka)**
**Telefoonka:** 020-50 50 50 (kama muuqanayo faatuurada taleefanka, luqado badan)

**Lex Femme**
**Telefoonka:** 020-22 00 55 (luqado badan)

**Haddi uu jiro cunfi iyo cadaadis sharaf la xiriira**

**Reusrsteam Heder (Tiimka gurmadka ee sharafta)**

Adiga ama qof kuu dhow ma ku nooshihiin cunfi iyo cadaadis la xiriira sharaf? Waxaad la xiriiri kartaa Resursteam Heder si aad u hesho talo iyo taageero. Ma u baahnid inaad sheegto qofka aad tahay. Tiimku waxay sidoo kale kugula kulmi karaan goob habboon.

**Telefoonka:** 070-910 52 72
**E-mail:** resursteam.heder@socialnordost.se









# Daryeelka caafimaadka

## Barnmorske-mottagning (BMM)

Barnmorskemottagning (rugta umulisooyinka), waxaa laguugu siinayaa daryeel caafimaad inta aad uurka leedahay iyo ka dibba, sidoo kalena waxaa lagu siinayaa taageero la xiriirta waalid noqoshada. Waxaad sidoo kale heli kartaa talo ku aaddan walxaha ka-hortagga uurka ee adiga kugu habboon, waxaadna isaga baari kartaa cudurrada galmada lagu kala qaado. Rugta umulisooyinka, waxaad xitaa isaga qaadeysaa baaritaanka muhiimka ah ee unugyada.

**Närhälsan rugta umulisooyinka Angered**
**Cinwaanka:** Angereds torg 5
**Telefoonka:** 031-747 96 50

**Närhälsan rugta umulisooyinka Bergsjön**
**Cinwaanka:** Rymdtorget 8
**Telefoonka:** 031-747 80 80

**Närhälsan rugta umulisooyinka Gamlestadstorget**
**Cinwaanka:** Gamlestadsvägen 4
**Telefoonka:** 031-747 80 70



# Vårdcentral (VC) iyo Barnavårds-central (BVC)

Halkaan waxaad ka heleysaa macluumaadka xiriirka ee rugta caafimaadka (VC) ee aaggaaga ku taal. Halkan ayaad la soo xiriireysaa haddii adiga ama ilmahaagu u baahanyahay daryeel caafimaad. Rugaha caafimaadku waxay sidoo kale leeyihiin rugo caafimaad oo carruureed (BVC). BVC-gu adiga ayuu waalid ahaan ku taageerayaa si uu ilmahaagu ugu koro si wanaagsan xag caafimaad iyo kalsooniba. Halkan waxaad kula kulmeysaa kalkaalisooyin caafimaad iyo taqaatiir khibrad gaar ah u leh caafimaadka carruurta ay da'doodu tahay 0-6 sano.

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Capio Angered

**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 3–5
**Telefoonka VC:** 031-722 11 80
**Telefoonka BVC:** 031-722 11 84

### Taqtarka degmada ee rugta caafimaadka iyo BVC-ga Kviberg

**Cinwaanka VC:** Rutmästaregatan 3-5
**Cinwaanka BVC:** Lafayette-huset
**Telefoonka VC:** 031-363 62 80
**Tele Telefoonka fon BVC:** 031-363 62 85

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Gårdsten

**Cinwaanka:** Muskotgatan 10
**Telefoonka:** 031-396 00 60

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Medical

**Cinwaanka:** Tusenårsgatan 3
**Telefoonka:** 031-222 300

### Närhälsan ee rugta caafimaadka iyo BVC-ga Angered centrum

**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Telefoonka VC:** 031-747 96 00
**Telefoonka BVC:** 031-747 96 40



Daryeelka caafimaadka

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Närhälsan Gamlestadstorget

**Cinwaanka:** VC: Säveåns Brygga 5
**Cinwaanka:** BVC: Väverigatan 14
**Telefoonka VC iyo BVC:** 031-345 07 00

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Närhälsan Hjällbo

**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Telefoonka VC:** 031-747 83 00
**Telefoonka BVC:** 031-747 83 64

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Närhälsan Lövgärdet

**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Telefoonka:** 031-747 85 50

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Nötkärnan Bergsjön

**Cinwaanka:** Rymdtorget 8D
**Telefoonka VC:** 031-792 94 00
**Telefoonka BVC:** 031-792 94 40

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Nötkärnan Kortedala

**Cinwaanka:** Årstidsgatan 42–48
**Telefoonka:** 031-750 31 00

### Rugta caafimaadka iyo BVC-ga Omtanken Kviberg

**Cinwaanka:** Anna Branzells gata 30
**Telefoonka VC:** 031-352 06 65
**Telefoonka BVC:** 031-352 06 61



Daryeelka caafimaadka

# Angereds Närsjukhus (Isbitaalka xaafadda Angered)

Angereds Närsjukhus waa isbitaal takhasus leh oo dhawr meel oo Angered iyo Gamlestaden ka mid ah, rugo qaabilitaan ku leh. Hoos ayaad ka heleysaa qaar ka mid ah rugaha qaabilaadda ee laga yaabo in ay kuu fiicnaan lahayd inaad taqaanno. Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato rugaha qaabilaadda ee jira, waxaad booqan kartaa bogga intarnetka ee **angeredsnarsjukhus.se.**

### Specialistcentrum Barn och Unga (Xarunta Takhasuska Carruurta iyo Dhallinyarada)

Specialistcentrum Barn och Unga waxaa loogu talagalay da'aadda 0-18 sano jirka ah. Labada xarumoodba waxay daweeyaan carruurta iyo dhallinyarada tusaale ahaan qabta neefta, xasaasiyadda, buurnaanta, kaadi macaanka iyo calaamadaha la xiriira dhimirka. Xitaa carruurta iyo dhallinyarada miisaankoodu hooseeyo iyo carruurta yaryar ee qabta dhibaatooyinka xagga cuntada waa lagu daweeyaa halkan. Waxay ruguhu sameeyaan qiimaynta caafimaadka carruurta, waxayna daweeyaan xaaladaha caafimaadka ee daba dheeraada. Waxay xitaa ka shaqeeyaan in ay qiimeyn qotodheer ku sameeyaan maskaxda ilmaha.

### Angered

**Telefoonka:** 031-332 69 01
**Cinwaanka:** Halmtorget 1
**Maxaddada:** Angered Centrum
**Bogga intarnetka:** angeredsnarsjukhus.se/sbua

### Gamlestaden

**Telefoonka:** 031-345 08 80
**Cinwaanka:** Byfogdegatan 3D
**Maxaddada:** Gamlestads torg
**Bogga intarnetka:** angeredsnarsjukhus.se/sbug

### Vulvamottagning

Vulvamottagning waxay qaabishaa bukaannada qaba dhibaatooyinka uu keeno gudniinka gabdhuhu. Waxay tani khuseyn kartaa la-talin, wadahadal taageero ah iyo dawaynta dhibaatooyinka jir ahaaneed ee ka dhashay gudniinka.

**Cinwaanka:** Halmtorget 1
**Telefoonka:** 031-332 69 02

### Levnadsvanemottagning

Levnadsvanemottagning waxay talo iyo wadahadal taageero siisaa dadka waaweyn, laga billaabo 18 sano jir, kuwaas oo doonaya in ay beddelaan caadooyinkooda nolosha ama raba in laga taageero in ay ilaashadaan caadooyinkooda nolosha ee caafimaadka qaba. Waxay taasi noqon kartaa wax ku saabsan cunto wanaagsan cunid, dhaqdhaqaaq badin, joojinta sigaarka ama yareynta khamri cabbidda.

**Cinwaanka:** Halmtorget 1
**Telefoonka:** 031-332 68 66
**E-mail:** ans.levnadsmottagningen@vgregion.se



# Folktandvården (Daryeelka ilkaha ee dadweynaha)

Folktandvården wuxuu idin daweynayaa adiga iyo ilmahaagaba. Xagga carruurta iyo dhallinyarada ay da'doodu u dhexeyso 0 ilaa iyo 23 sano, waa u lacag la'aan daweyntu. Waxaan rabnaa inaan carruurta, dhallinyarada iyo waaliddiintaba siinno aqoon ku saabsan sida loo haysan karo ilko caafimaad qaba nolosha oo dhan. Waaliddiinta leh carruur 1-6 sano jirta waxaa la siinayaa talooyin ku saabsan caafimaadka ilkaha iyo caadooyinka cuntada. Kuwa ugu fursadaha fiican in ay helaan caafimaad ilko oo wanaagsan waa kuwa horbaba waqti hore oo noloshooda ka mid ah hela caadooyin cunto oo wanaagsan. Waxaan carruurta iyo dhallinyarada ugu yeernaa baaritaanno joogto ah oo aan ku siineyno talooyin ku saabsan sida caafimaadka ilkaha loo ilaashan karo. Sida uu sharcigu qabo waxay dhammaan carruurtu, Iswiidhan, xaq u leeyihiin daryeel ilko.

### Folktandvården Angered

**Cinwaanka:** Triörgatan 2
**Telefoonka:** 010-441 74 50

### Folktandvården Bergsjön

**Cinwaanka:** Rymdtorget 8B
**Telefoonka:** 010-441 98 20

### Folktandvården Gamlestaden Kulan

**Cinwaanka:** Kullagergatan 6A
**Telefoonka:** 010-441 85 80

### Folktandvården Hjällbo

**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 91
**Telefoonka:** 010-441 81 20

### Folktandvården Kortedala

**Cinwaanka:** Kortedala Torg 9
**Telefoonka:** 010-441 98 30

# Rugta qaabilaadda carruurta qaxootiga

Waxaad la xiriiri kartaa rugta qaabilaadda carruurta qaxootiga haddii aad ka yartahay 18 sano oo aad leedahay astaamo jireed iyo maskaxeed oo ay dhici karto in ay xiriir la leeyihiin socdaalka iyo qixidda. Carruurta qoyskooda la socda iyo carruurta keligoo waddanka timidba waa la soo wada dhaweynayaa. Taqtar ayaa rugta kuu soo gudbinaya, laakiin adiguna sidoo kale barta intarnetka waad ku soo dalban kartaa daryeel.

**Cinwaanka:** Byfogdegatan 3D
**Telefoonka:** 070-020 60 26
**Maxaddada ugu dhaw:** Gamlestads torg
**Bogga intarnetka:** vgregion.se/flyktingbarnmottagning



Foto: mostphotos.com

Familjeguiden finns även digitalt.

You can find the familyguide in english here.

Hagaha qoyska ayaad sidoo kale ka heli kartaa af soomaali.

ميكنكم االطالع عل دليل العائلة باللغة العربية من هنا.

**goteborg.se/foraldrastod**

Si aad wax dheeri ah uga ogaato hawlaha iyo dhacdooyinka iminka ka jira magaalada Göteborg eeg bogga **kalendarium. goteborg.se**

**Ma jiraan wax aad tebeysid oo aan buug-yaraha ku jirin ama ma haysaa aragti ama su’aalo?**

Fadlan la soo xiriir socialnordost@ socialnordost.goteborg.se

Göteborgs Stad 240216-001-163 Somaliska PDF Foto: Lo Birgersson, om inget annat anges April 2025